SOMALI

# Ku soo dhowow Finland



Ministry of Economic Affairs
and Employment of Finland

**Ministry of Economic Affairs and Employment**
P.O. Box 32, FI-00023 Government
Tel. +358 29 516 001
www.tem.fi

MEAE guidelines and other publications 2022:14 SO,
Ku soo dhowow Finaland

ISSN 2342-7922 (electronic publications)
ISBN 978-952-327-622-2

Contents: www.infofinland.fi
Design and layout: Sissy Oy

# Ku soo dhowow Finland

Waxaad gacanta ku haysaa hage, kaas oo loogu talaggalay in uu kaa caawiyo marxaladda hore ee billowga ah ee degista Finland. Hagaha waxaa ku jira macluumaad ku saabsan degitaanka, shaqo qabashada iyo saraakiisha dowladda iyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan bulshada Finnishka ah. Macluumaadka hagaha waxaa laga soo uruuriyay adeegga shabakadda ee InfoFinland, halkaas oo aad sidoo kale ka heli karto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mowduucyada hagahan. Horumarinta laqabashada Finland ee dadka dalka u soo guuray waxaa laga dejiyay sharciga u gaar ah. Sida uu sharcigaas qabo, qof kasta oo Finland u soo guuraya waxaa la siinayaa macluumaad ku saabsan nolosha Finland iyo bulshada Finnishka ah.  Haddii macluumaadka ku jira haguhu aanay dhammaantood hadda ahayn kuwa ku quseeya, meel dhigo hagaha. Gadaal dambe ayaad uga baahan kartaa. Ka sokow hagahan, waxaa kale oo lagu siinayaa talooyin iyo hagitaanno kale, si sal-dhigista Finland ay sida ugu macquulsan kuugu fududaato. Macluumaadyada dheeraadka ah oo arrima badan ku saabsan waxaad si gaar ah uga heleysaa degmadaada ama bogagga degmooyinka ee adeegga shabakadda InfoFinland.

**Ku soo dhowow oo qayb ka noqo bulshada Finland!**

**Macluumaad dheeraad ah:**

Adeegga shabakadda ee InfoFinland: [infofinland.fi](infofinland.fi)

Hagaha Ku soo dhowow Finland ee shabakadda ku jira:
[tem.fi/tervetuloa-suomeen](tem.fi/tervetuloa-suomeen)

# Qoralka gudihiisa


**1. U soo guurista Finland** . . . . . . . . 9

**1.1. Muwaadiniinta Midowga Yurub** 9

Diiwaangelinta xaqa joogitaanka muwaadinka Midowga Yurub . . . . . 12

**1.2. Aan aheyn muwaadin EU** 13

Shaqo u imaanshaha Finland . . . . . . . . 13

Ganacsade ahaan u imaanshaha Finland . . . . . . . . 13

Waxbarasho u imaanshada Finland. . . . . . . . 15

Xubin qoys oo Finland joogta . . . . . . . . 16

Ogolaanshaha sii-socda . . . . . . . . 16

Sharciga joogtada ah. . . . . . . . 17

Dhibaatooyinka Ogolaansha deganaanshaha . . . . . . . . 17

**1.3. Muwaadiniinta u dhashay wuqooyiga Yurub** 17

**1.4. Isu diiwaangelin degene** 18

Guri degmo ee gudaha Finland. . . . . . . . 19

**2. Nolosha Finland** . . . . . . . . 21

**2.1. Degidda Finland** 21

La-qabsashada Finland. . . . . . . . 21

Nolol maalmeedka dalka Finland . . . . . . . . 23

Heerka sicirka Finland . . . . . . . . 24

Turjubaan ma u baahan tahay? . . . . . . . . 25

Ammaanka bulsho ee Finland . . . . . . . . 25

Dhalashada Finland . . . . . . . . 27

**2.2. Shaqo iyo ganacsi** 27

Shaqo ka helista Finland. . . . . . . . 27

Shahaadooyinka ajnabiga markii la keeno Finland . . . . . . . . 29

Xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha . . . . . . . . 30

Shuruudaha xiriirka shaqada iyo mushaarka Finland . . . . . . . . 31

Fasaxa sannadka . . . . . . . . 31

Caafimaadka iyo Badbaadada shaqaalaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 31
Haddii aad jirato . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 31
Fasaxyada qowska . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 31
Shahaado shaqo . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32
Shirkad ganacsi ku samaynta Finland . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32
Canshuurid . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32
Haddii aad shaqo la'aan noqotid . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 34
Dhaqanka Finnishka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 35

**2.3. Luqada Finnishka iyo Iswidishka** **37**

Maxaan u baranayaa Finnishka ama Iswidishka? . . . . . . . . . . . . . . . . . . 37
Barashada afka Finnishka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 37
Luqada Finnishka ee internetka ku jirta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 38
Shahaadada rasmiga ah ee aqoonta luqada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 38
Luuqadda Iswidishka Finland dhexdeeda . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 39

**2.4. Deganaanshaha** **40**

Deganaanshaha Finland . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 40
Guri kiro . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 40
Heshiiska kirada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 42
Guri iibsasho . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 42
Kaalmada ijaarka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 43
Xuquuqda iyo waajibaadka deganaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 43
Nabadgelyada guriga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 46
Qashinka iyo dib u isticmaalidda . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 48

**2.5. Waxbarashada** **49**

Nidaamka waxbarashada ee Finnishka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 49

**2.6. Caafimaadka** **52**

Adeega caafimaadka ee Finland . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 52
Caafimaadka ilmaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 54
Dareelka ilkaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 56
Caafimaadka dhimirka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 57
Dawooyinka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 58

**2.7. Qoyska** 59

Finland markii uu ilmuhu dhaso . . . . . 59

Dheelitirka nolosha qoyska iyo shaqada . . . . . 59

**2.8. Xaaladaha dhibka** 60

Dhibaatooyinka dhaqaale . . . . . 60

Takooridda iyo midab-takoorka . . . . . 61

Dembiyada . . . . . 62

Dagaalka . . . . . 62

Ka ganacsiga dadka iyo ku shaqaysiga qasabka ah. . . . . . 64

**2.9. Waqtiyada firaaqada** 65

Maktabadaha . . . . . 65

Isboortiga . . . . . 65

Ku raaxeysiga iyo ku socodka dabeecadda . . . . . 66

Ururada . . . . . 67

## 3. Warar ku saabsan Finland . . . . . 69

**3.1. Warar aasaasi ah oo ku saabsan Finland** 69

Finland oo la soo koobay . . . . . 69

Gaadiidka gudaha Finland . . . . . 70

Saxaafadda gudaha Finland . . . . . 72

Dhaqamada iyo diimaha ka jira Finland . . . . . 72

Doorashooyinka iyo codeynta Finland . . . . . 73

Sharciyada iyo xuquuqda . . . . . 74

Sinnaanta iyo isku qiimo ahaanshaha . . . . . 75

Saraakiisha muhiimka ah . . . . . 76



# 1. U soo guurista Finland

## 1.1. Muwaadiniinta Midowga Yurub

Haddii aad tahay muwaadin dal Mdowga Yurub ka tirsan, uma baahnid ogolaanshaha joogitaanka Finland. Haddii Finland deggan tahay wakhti ka badan saddex bilood, waa in aad diiwaangelsiaa xuquuqdaada joogitaanka.

Taasina waxay quseysaa muwaadiniinta Switzerland iyo Liechtenstein. Waad imaan kartaa Finland, haddii aad haysato kaarka aqoonsiga ama baasaboor shaqaynaya. Waxaad si lamid ah muwaadiniinta Finland xaq u leedahay in aad Finland ka shaqeyso, ganacsade ka noqoto ama wax ka barato. Waa in aad Finland ku haysataa dhaqaalaha noloshaada.

Finland waxaa si xiriir ah wax uga baran kartaa saddex bilood adigoo aan diiwaangelin xuquuqdaada joogitaanka dalka. Haddii aad doonayso in aad Finland joogto degane ahaanna isaga diiwaangeliso, waa in aad haysataa shaqo ama shirkad shaqanaysa, boos waxbarasho, xiriir qoys oo wakhti dheer ah ama lacag ku filan.

Haddii aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto ugu yaraan muddo sannad ah islamarkaasna aad doonayso guri-degmo, ku wargeli guuritaankaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka (Digi- ja väestötietojärjestelmä). Haddii aad guri degmo (kotikunta) ku leedahay Finland , sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

Haddii aad si xiriir ah u joogayso Finladn wax ka yar saddex bilood, uma baahnid in aad codsato diiwaangelinta xaqa joogitaanka dalka. Joogitaanka saddexda bilood ah waxaa markasta laga tiranayaa, marka aad bannaanka uga baxdo xuduudaha Finland.

## Shaqo u imaanshaha Finland

- Haddii aad tahay muwaadin Midowga Yurub Finland uguma baahnid ruqsad shaqo. Horay ayaad shaqo ka billaabi kartaa marka aad dalka timaado.
- Kaarka canshuurta ka soo qaado Xafiiska Canshuurta ee kuugu dhow kaddibna u gee shaqo-bixiyahaada. Bixinta mushaarka iyo canshuurta darteed ayuu shaqo-bixiyuhu ugu baahan yahay kaarka.
- Waxaad u baahan yahay aqoonsiga qofka ee Finnishka. Ka codsi Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka ama xafiiska canshuurta. Horay oray u sii qaado kaarka aqoonsiga ama baasaboor shaqeynaya iyo heshiiska shaqada.
- Haddii ay shaqadaada Finland qaadanayso wax ka badan 3 bilood, ka codso adeegga Enter Finland ama Hoggaanka Socdaalka Finland ama goobta adeegga Hoggaanka socdaalka ee kuugu dhow diiwaangelinta xaqa joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub.
- Haddii aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto ugu yaraan muddo sannad ah islamarkaasna aad doonayso guri-degmo, ku wargeli guuritaankaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Haddii aad guri degmo ku leedahay Finland, sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

Haddii aad dibadda uga timid Finland si aad uga shaqeyso waxaad u baahan tahay aqoonsiga qofka ee Finnishka. Aqoonsiga qofka waxaad ka heli kartaa:

- Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka,
- xafiiska Canshuurta ama
- Hoggaanka socdaalka islamarka aad diinwaagelinayso xaqa joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub.

Dhammaan dadka ka shaqeynaya Finland waa in ay heystaan kaarka canshuurta (verokortti). Haddii aad ka shaqayso dhismaha waxaad sidoo kale u baahan tahay lambarka canshuurta. Kaarka canshuurta iyo lambarka canshuurta waxaad ka heli kartaa xafiiska canshuurta.

## Ganacsade ahaan u imaanshaha Finland

- Haddii aad tahay muwaadin Midowga Yurub ah Finland waad ka aasaasan kartaa shirkad, haddii aad deegaan rasmi ah ku leedahay wadan ka tirsan Soonaha Dhaqaalaha Yurub (ETA). Shirkad ajnabi ah waxey xittaa Finland ka billaabi kartaa shaqo shirkadeed.
- Billaabista shaqada shirkadda ka samee ogeysiiska aasaasidda Diiwaanka ganacsiga ee Maamulka diiwaanka iyo ruqsadaha iyo Maamulka canshuurta.
- Haddii uu joogitaankaada Finland qaadanayo wax ka badan 3 bilood, ka codso adeegga Enter Finland ama Hoggaanka Socdaalka Finland ama goobta adeegga Hoggaanka socdaalka ee kuugu dhow diiwaangelinta xaqa joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub.
- Haddii aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto ugu yaraan muddo sannad ah islamarkaasna aad doonayso guri-degmo, ku wargeli guuritaankaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Haddii aad guri degmo ku leedahay Finland, sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

## Waxbarasho u imaanshada Finland

- Haddii aad tahay muwaadin Midowga Yurub waad codsan kartaa in aad wax ka barato machad Finland laga aqbalsan yahay.
- Haddii ay waxbarashadaada Finland qaadanayso wax ka badan 3 bilood, ka codso adeegga Enter Finland - ama Hoggaanka Socdaalka Finland ama goobta adeegga Hoggaanka socdaalka ee kuugu dhow diiwaangelinta xaqa joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub.
- Haddii aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto ugu yaraan muddo sannad ah islamarkaasna aad doonayso guri-degmo, ku wargeli guuritaankaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Haddii aad guri degmo ku leedahay Finland, sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

## Xubin qoys oo Finland joogta

- Haddii aad tahay muwaadin Midowga Yurub ah aadna Finland ugu soo guureyso si aad ula degtid xubin qoyskaada ka mid ah, waa in aad diiwaangelinta xaqa joogitaanka ee muwaadinka Midowga Yurub uga codsataa xiriir qoys adeegga Enter Finland ama goobta adeegga ee Hoggaanka socdaalka.
- Haddii aadan aheyn muwaadin Midowga Yurub ah, laakiin xubinta qoyskaada ka tirsan ee Finland deggan uu yahay muwaadin Midowga Yurub waxaad u baahan tahay kaarka joogitaanka ee xubinta qoyska muwaadinta Midowga Yurub. Waxaa kaarka laga codsadaa adeegga Enter Finland ama goobta Adeegga Hoggaanka socdaalka.
- Haddii aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto ugu yaraan muddo sannad ah islamarkaasna aad doonayso guri-degmo, ku wargeli guuritaankaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Haddii aad guri degmo ku leedahay Finland, sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

# Diiwaangelinta xaqa joogitaanka muwaadinka Midowga Yurub

Haddii aad tahat muwaadin u dhashay dal Midowga Yurub ah islamarkaasna aad dooneyso in aad degnaato Finland wax ka badan saddex bilood, waa inaad ka diiwaangelisaa xaqa joogitaankaada. Codso diiwaangelinta xaqa joogitaanka muwaadinka Midowga Yurub saddex bilood gudohood laga billaabo maalinta imaanshaha dalka.

Diiwaangelinta ay sameyso Hay'adda socdaalku waa arrin ka duwan ka diiwaangelinta meesha aad deggan tahay nidaamka macluumaadka dadka ee Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka (Digi- ja väestötietovirasto). Uma baahnid in aad joogitaanka ka diiwaangeliso Hay'adda Socdaalka haddii aad Finland si xiriir ah u joogeyso wax ka yar saddex bilood. Joogitaanka saddexda bilood waxaa laga soo tirinayaa markasta oo aad tagto meel ka baxsan xuduudaha Finland.

# 1.2. Aan aheyn muwaadin EU

## Shaqo u imaanshaha Finland

Haddaad u imaaneyso Finland shaqo islamarkaasna aad tahay muwaadin u dhashay wadan aan ahayn Midowga Yurub ama Waqooyiga Yurub, waxaad u baahan tahay sharci deganaansho. Sharciga degenaanshahana waa inaad soo codsataa intaadan imaan Finland.

Ka hor inta aadan helin sharci degenaanshana, waa inaad ka heshaa goob shaqo Finland. Markii aad hesho goobtii shaqadana, waad codsan kartaa sharciga degenaanshaha.

Si aad u shaqeyso waxaad u baahan tahay sharciga deganaanshaha, hadduu ahaan lahaa sharci degenaansho shaqo ama sharci aad ku shaqeysan karto. Nooca sharciguna wuxuu ku xiran yahay hadba shaqada aad qabaneyso.

## Ganacsade ahaan u imaanshaha Finland

Haddii aad doonayso in aad ganacsade ahaan uga shaqayso Finland islamarkaasna aad tahay muwaadin u dhashay waddan aan ahayn Midowga Yurub ama Waqooyiga Yurub waxaad u baahan tahay sharciga deganaanshaha ee ganacsadaha. Haddii aad doonayso in aad Finland ka samaysato shirkad Start-up, waxaad u baahantahay sharciga deganaanshaha ee start-up. Sharciga degenaanshahana waa inaad soo codsataa kahor inta aadan imaan Finland.

Hawshaada ganacsi waa in ay noqotaa mid faa'iido leh, dakhliga ganacsigaada kaa soo gala waa in uu daboolaa noloshaada. Haddii ay shirkaddaadu tahay mid start-up ah oo aan weli lahayn dakhli sanadeed, waxaad dhaqaalaha nololmaalmeedkaada ku caddayn kartaa dakhliyo kale oo ku soo gala.

Sharciga deganaanshaha laguuguma siinayo sabab ah, in aad shirkad leedahay. Waa in aad adiga ka shaqaysaa shirkaddaada Finland, si aad u hesho sharciga degenaanshaha.

### Sharciga degenaanshaha ganacsadaha

Waa in aad shirkaddaada ka diiwaangelisaa rajistareeshinka ganacsiga ee Maamulka batantaha iyo rajistareeshinka (Patentti- ja rekisterihallitus) kahor inta aadan codsan sharicga deganaanshaha ganacsadaha. Haddii aad tahay ganacsade gaar ah, yacni aad leedahay magac ganacsi, waxaad sharciga degenanaasha dartiis u baahantahay Summadda Y (Y-tunnus). Haddii aad codsanayso sharciga degenaanshaha ee ugu horreeya welina aadan imaan Finland, uma baahnid Summadda Y.

Ka baaraandegista codsiga sharciga degenaanshuhu waa labo marxaladood. Marka koowaad Xarunta ELY (Xarunta deegaanka, gaadiidka iyo shaqooyinka) (ELY-keskus) ayaa qiimeyneysa faa'iidada shirkaddaada iyadoo qiimeynta ku saleynaysa qorshaha ganacsi iyo maalgelinta Markaas kaddib ayeey Hay'adda socdaalku go'aan ka gaareysaa sharciga degenaanshaha.

Bogagga Hay'adda socdaalka ayaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciga degenaanshaha ganacsadaha.

## Sharciga degenaanshaha Startup

Haddii aad dooneyso in aad Finland ka aasaasto shirkad Startup ah, waxaad codsan kartaa sharciga degenaanshaha Startup ee loogu talagalay ganacsatada soo koreysa. Si aad u hesho sharciga degennaanshaha ee startup waa in aad heysataa qorshe ganacsi ee la taaban karo.

Codsashada sharciga degenaanshaha Startup wuxuu maraa labo marxaladood.

- Marka hore waa in aad ka heshaa Business Finlandbayaan ogolaansho ah. Business Finland ayaa qiimeynaysa tusaalaha ganacsiga ee shirkaddaada, aqoonta iyo awoodda aad ku kordhin karto ganacsigaada. Ma heli kartid sharciga degenaanshaha Startup haddii aadan Business Finland ka haysan bayaan ogolaansho ah.
- Kaddib marka aad ka hesho Business Finland bayaan oggolaansho ah, waxaad Hay'adda socdaalka ka codsan kartaa sharciga degenaanshaha Start-up. Bayaanka Business Finlandwuxuu shaqeynayaa labo bilood.

Bogagga Hay'adda socdaalka iyo Business Finland waxaad ka heleysaa tilmaamo iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsashada sharciga degenaanshaha start-up.

## Codsashada sharciga degenanaashaha

Ka codso sharciga degenaanshaha ganacsadaha ama sharciga degenaanshaha start-up shabakadda Enter Finland -adeeggeeda. Marka aad codsiga sameyso waa in aad tagtaa safaaradda Finland ee kuugu dhow si aad u caddeyso aqoonsigaada islamarkaasna aad u soo bandhigto asalka lifaaqyada codsiga Waa in aad safaaradda tagtaa saddex bilood gudohood laga soo billaabo marka aad codsiga ka sameysay shabakadda Codsiga waxaa laga baaraandegayaa marka aad saafaradda tagto kaddib Safaaradda waa in ballan horay looga qabsadaa.

# Waxbarasho u imaanshada Finland

Haddii aad Finland u imaanayso waxbarasho waqti ka badan 90 maalmood islamarkaasna aad tahay muwaadin waddan aan ahayn Midowga Yurub ama Waqooyiga Yurub waxaad u baahan tahay sharciga deganaashaha. Sharciga degenaanshahana waa inaad soo codsataa intaadan imaan Finland.

Ka hor inta aadan helin sharciga deganaashaha waa in aad Finland ka heshaa boos waxbarasho. Marka uu ku aqbalo machad waxbarasho oo Finland ku yaal, ayaad codsan kartaa sharciga deganaanshaha.

Booska waxbarashadu waa in uu buuxiyaa mid kamid ah shuruurdahan soo socda:

- waxbarashadaadu waa kuwa ku gaarsiinaya xirfad ama shahaado
- waxaad ka qeybqaadaneysaa barnaamij arday kala beddelasho oo u dhexeeyo machadyo ama wax kale
- waxaad baraneysaa waxbarasho dhameystir ah oo shahaadadaada la xiriirta ama waxbarasho takhasus ah

Booska waxbarashada waxaad codsan kartaa marka lagu jiro codsiga wadajirka dugsiyada ee guga ama deyrta. Codsiga wadajirka (yhteishaku) ah ee waxbarashooyinka kale qaarkood wuxuu dhacaa Janaayo. Waqti hore sii ogow waqtiga aad booska waxbarashada codsan karto.

## Marka ay waxbarashooyinku dhamaadaan

Haddii aadan shaqo haysan, waxaad codsan kartaa sharciga deganaanshaha oo ku salaysan shaqo raadin ama shirkad samaysasho. Markaas waxaad heli kartaa ugu badnaan sharci deganaansho oo sannad ah. Waa in aad oggolaanshaha codsataa ka hor inta aanu sharciga deganaanshaha ardaygu kaa dhammaan. Shaqada waxaad billaabi kartaa islamarka aad hesho shaqo.

Haddii aad shahaado ka qaadatay Finland islamarkaasna aad shaqo heshay, waxaad codsan kartaa sharciga deganaanshaha ee shaqada ku salaysan. Haddii aad qalinjebinti ka dib ka baxday Finland, waxaad weli codsan kartaa sharciga deganaanshaha ee ku salaysan qaadashada shahaadada. Si kastaba ha ahaatee, waa in aad heysataa heshiis shaqo oo la saxiixay ama shaqo si dhab ah laguugu ballanqaaday.

## Xubin qoys oo Finland joogta

Dhammaan xubnaha qoysku ma wada helayaan sharci degenaasho. Sharciga caadiyan waxaa heli kara qofka deggan Finland lamaanihiisa, lamaanaha ay wada nool yihiin, carruurtiisa aan qaangaarin iyo carruurta aan qaangaarin ee codsanaysa waalidkood.

## Ogolaanshaha sii-socda

Haddii wakhtiga sharcigaada deganaanshuhu uu dhammaanayo islamarkaasna aad doonayso in aad Finland sii joogto, waxaad u baahan tahay oggolaanshaha joogitaanka oo ku meel gaar ah. Waa muhiim in aad codsato sharciga deganaanshaha sii-socda ka hor inta aanu dhicin sharcigaagi hore. Ogolaanshaha sii-socda waxaad codsan kartaa oo kaliya, haddii aad Finland joogto.

Haddii sharcigaagu uu kaa dhaco adiga oo laguu falanqaynayo dalabkaaga, waxaa kuu bannaan inaad ku noolaato sida caadiga ahna aadna ka shaqaysato wadanka inta falanqayntu kuu socoto. Haddii aad dalbato cusboonaysiinta sharcigaaga daganaanshaha adigoo kaagii hore kaa dhacay, waxaa kuu bannaan inaad dalka joogto laakiin kuuma bannaana inaad dalka ka shaqaysato illaa aad hesho sharciga la cusboonaysiiyay.

Hay'adda Socdaalku waxey kuu oggolaanaysaa sharciga cusboonaysiintiisa haddii sababtii d ku heshay sharcigii hore ay wali sidii u jirto. Sharciga cusub waxa kuu bannaan xataa in aad ku dalbato sabab ka duwan tii hore ee ad sharcigii hore ku dalbatay. Xusuusnow, in aad buuxiso shuruudaha sharciga oggolaanshaha ee laga hadlay.

Si aad sharciga sii-socda uga hesho Finland, waa in aad heysataa dakhli ku filan noloshaada. Haddii xubnaha qoyskaadu ay sidoo kale dalbanayaan sharciga sii-socda, shuruudda dakhliga ku filan iyagana waa ay quseysaa. Xaaladaha qaarkood marka lagu jiro hay'adda socdaalku kuma xirto dakhli ku filan. Bogagga Xafiiska dal u soo guurista ayaad ka hubsan kartaa, cadadda dakhliga la iska rabo iyo qofka laga rabo.

## Sharciga joogtada ah

Waxaad heli kartaa sharci joogtada ah (P), haddii

- aad daggantahay Finland ugu yaraan afar sano adiga oo ku deggan sharciga A iyo
- haddii aanad mudadaas daganayn wadan kale oo dibadda ah mudo ka badan labo sano iyo
- haddii ay jiraan shuruudihi laguugu siiyay sharciga deganaanshaha sii socda.

## Dhibaatooyinka Ogolaansha deganaanshaha

Haddii ay dhibaato kaa heysato dhinaca ogolaanshaha ama aysan kuu kala cadeynta arrimaha ogolaanshaha degitaanka dalku, waxaad talo weydiin kartaa goobaha soo socda:

- Hay'adda socdaalka (Maahanmuuttovirasto)
- Safaaradaha Finland ee dibadda ku yaal
- adeegyada hagitaanka iyo talasiinta degmaadada ee loogu talaggalay dadka dalka uu soo guuray ee Finland jooga
- Rugta la-talinta qaxootiga (Pakolaisneuvonta)
- Xafiiska caawimaadda arrimaha sharciga

# 1.3. Muwaadiniinta u dhashay wuqooyiga Yurub

Haddii aad tahay muwaadin u dhashay waddan ka mid ah Woqooyiga Yurub islamarkaasna aad Finland u soo guurayso, uma baahnid in aad codsato sharciga deganaanshaha dalka iyo in aad sababayso joogitaankaada Finland. Waxaad si la mid ah muwaadiniinta Finland xaq u leedahay in aad Finland shaqo ka qabato, ganacsade ka noqoto ama wax ka barato.

Haddii aad ku talajirto in aad Finland deganaato ugu badnaan lix bilood, uma baahnid in aad saraakiisha Finland u dirto wax wargelin ah.

Haddii aad ku talajirto in aad Finland deganaato wax ka badan lix bilood, iska diiwaangeli goobta adeegga ee Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka.

Horay u sii buuxi foomka diiwaangelinta ajnabiga. Si shakhsi ah u gey goobta adeegga ee Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka horayna u sii qaado aqoonsigaada rasmiga ah ama baasaboorkaada shaqaynaya.

## 1.4. Isu diiwaangelin degene

Marka aad Finland si rasmi ah ugu soo guurto, waxaa lagaa diiwaangelinayaa nidaamka macluumaadka dadka ee Finland. Waxaad islamarkaas heleysaa aqoonsiga qofka ee Finnishka. Haddii aad doonayso guri degmo, inta badan waa in aad tagtaa Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka.

Cinwaannada dhammaad dadka ajnabiga ah laguma diiwaangelin karo nidaamka macluumaadka dadka. Diiwaangelinta waxaa la samaynayaa oo kaliya, haddii ay buuxsamaan shuruudaha diiwaangelinta.

### Summadda aqoonsiga Finnishka

Aqoonsiga qofku waa 11 calaamadood oo lambaro ah, kuwaas oo ku salaysan maalinta dhalashada iyo jinsiga qofka.

Aqoonsiga qofka waxaad u baahan tahay tusaale ahaan marka aad dano ka qabsanayso saraakiisha, bangiyada ama shaqo-bixiyaha. Aqoonsigaada mid la mid ah cid kale ma haysan karto. Aqoonsiga qofka waxaad heleysaa, marka lagaa diiwaangelinayo nidaamka macluumaadka dadka.

Waad heli kartaa aqoonsiga qofka, haddii aad si sharci ah u joogto Finland. Joogitaanka sharciga ah wuxuu ku salaysnaan karaa tusaale ahaan sharciga deganaanshaha dalka, xorriyadda dhaqdhaqaaqa ee Midowga Yurub, fiiso ama dal-ku-gal ama nidaamka fiiso la'aanta. Waxaa intaas dheer oo la iska doonayaa in shuruudahan soo socda midkood la biixiyo:

- Shaqo, waxbaraasho ama wax u dhigma oo Finland ka dhacaya darteed ayaad u baahan tahay aqoonsiga qofka.
- Xubin qoyskaada ka tirsan ayaa cinwaan la diiwaangeliyay ku leh Finland.
- Hoggaanka socdaalka ayaa ku siisay sharciga deganaanshaha dalka ama kaarka joogitaanka ama diiwaangelisay xaqaada joogitaanka muwaadinka Midowga Yurub ee Finland.

Diiwaangelinta iyo aqoonsiga qofka waxaad ka codsan kartaa:

- Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka
- xafiiska canshuurta, haddii aad canshuuritaan dartiis ugu baahan tahay aqoonsiga qofka.

Hogaanka socdaalka ayaa inta badan bixisa aqoonsiga qofka, marka ay go'aan ka gaarayso sharciga deganaanshaha ama xaqa diiwaangelinta muwaadinka Midowga Yurub ama xaqa joogitaanka ee xubinta qoyska muwaadinka Midowga Yurub.

Haddii aad aqoonsiga qofka ka heshay Hoggaanka socdaalka ama Maamulka canshuuraha, laakiin aad doonayso in cinwaankaada iyo macluumaadka xiriirka qoyska lagu kaydiyo nidaamka macluumaadka dadka, waa in aad kuwaas diiwaangelitooda ka codsataa Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka.

## Guri degmo ee gudaha Finland

Degmooyinku waxay deganayaashooda siiyaan adeegyo badan. Adeegyada degmadu waa tusaale ahaan daryeelka caafimaadka, waxbarashada iyo barbaarin-horaadka carruurta. Haddii aad guri degmo ku leedahay Finland, sida caadiga ah waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada degmada.

Waxaa kuu wanaagsan in aad hubsato, in aadiga iyo xubnaha kale ee qoyskaadu aad xaq u leedihiin guri degmo oo Finland ah. Xaq u lahaanshaha guriga degmo ee Finland wuxuu ku salaysan yahay sharciga guri degmo. Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka ee degmaadada ayaad ka hubsan kartaa, in aad xaq u leedahay guri degmo oo Finland ah.

Si aad guri degmo uga hesho Finland, waa in aad Finland ugu soo guurtaa si rasmi ah. Haddii aad si ku meelgaar ah u deggantahay Finland, tusaale ahaan aad Finland u soo guurto waxbarasho ama shaqo qaadanaysa ugu badnaan hal sano, sida caadiga ah, Finland kama heli kartid guri degmo.



# 2. Nolosha Finland

## 2.1. Degidda Finland

## La-qabsashada Finland

Finland waxaa laga helaa adeegyo kala duduwan, kuwaas oo caawinaya degitaanka, shaqo helista iyo barashada luqada. Adeegyada waa tusaale ahaan sahan-horaadka, qorshaha la-qabsashada iyo waxbarashada la-qabsashada. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in xubnaha qoyskaadu ay iyaguna xaq u leeyihiin adeegyadan, haddii ay Finland kuula soo guuraan.

### Adeegyada, kuwaasoo kaa caawinaya la qabsashada wadanka

#### Talosiinta sooguureyaasha wadanka

Xaafiiska shaqada iyo shaqaaleynta iyo degmooyinka waxay leeyihiin talosiinta ajaanibta. Iyagaa kaa caawin doona la qabshadda Finland. Talosiiiyaha ayaad ka helaysaa warbixin dheeri ah tusaale

- la qabsashadda iyo adeegyada, kuwa kaa taageeraya la qabsashada
- nolosha shaqada
- iskoollada iyo waxbarashada.

#### Qeymeynta hore

Hawlwadeenka ayaa marka lagu jiro sahminta hore kula qiimeynaya adeegyada kaa caawinaya la qabsashada dalka. Hawlwadeenka ayaa marka lagu jiro sahminta ah ka salgaaraya tusaale ahaan waxbarashadaada, waayo-aragnimadaada shaqo iyo aqoontaada luqadeed. Xafiiska shaqada iyo meherada ama degmada ayaa samaynaya sahminta hore. Waxaa kale oo lagu samayn karaa meel kale, tusaale ahaan machadka waxbarashada. Tani waxay ku xirantahay degmada aad deggantahay.

Waxaad ka codsan kartaa xaafiiska shaqadda iyo shaqaaleynta ama xaafiiska degmadaada, in laguu sameeyo qeymeynta hore. Waxaad ka heli kartaa faahfaahin dheeraad ah talosiiyaasha ajaaniibta, sidii laguugu qabanqaabin lahaa degmadaada.

## Qorsheynta la qabsashada

Haddii aad u baahantahay taageerada laqabsashada dalka, hawlwadeenka ayaa sahminta hore kaddib kula samaynaya qorshaha laqabsashada dalka. Qorsahaha laqabsashada waxaa la samaynayaa, haddii aad

- tahay shaqo la’aan shaqo raadis ah ama
- aad qaadato taageerada kaalmada nolosha ama
- aad ka yartahay 18 sano mas’uul ama waalidna aanu Finland kuu joogin.

Qorsheynta la qabsashada waxaa lagu qorayaa arrimaha kaa caawinaya laqabshada. Qorshaha waxaa ka mid ahaan kara, tusaale, barashadda luuqada, ama waxbarasho kale ama tababar shaqo. Waxaa kula sameyn kara qorshaha la qabsashada talobixiyaha jooga Xaafiiska Shaqada iyo Xoogsashada ama adeegyada shaqaaloobidda degmadaada ama xafiiska sooshalka.

Qorsheynta la qabsashada waa in lagu sameeyaa 3 sano guddahood laga bilaabo maalinttii aad sharciga qaadatay, ama xuquuqdaada joogitaanka la diiwaangeliya, mudadda uu qorshuhu soconayo waxay ku xiran tahay mudadda uu soconayo qorshahala qabsashada. Qorsheynta la qabsashada waxaa u sida caadiga ah socdaa muddo ugu badnaan saddex sano ah. Xaaladaha aan caadiga ahyn wuxuu socon karaa shan sano.

Marka laguu sameeyo qorshaha laqabsashada, waa muhiim in aad u hoggaansantaa.

Haddii aad shaqo haysato, waxaa mararka qaar suuragal ah in shaqo-bixiyahaadu uu kaa caawiyo la qabsashada. Shaqo-bixiyuhu wuxuu kuu raadin karaa kooraska luqada Finnishka. Faahfaahinta dheeraadka ah ee arrintan weydii shaqo-bixiyahaada.

## La qabsashadda iyo iskoolka

Marka qorshaha la qabsashada la sameeyo, waxaad heli kartaa waxbarashada la qabsashada. Waxbarashada la qabsashada waxaa qabanqaabiya machadyo kala duwan. Xafiiska shaqada iyo meherada ama degmada ayaa kugu hagaysa waxbarashada la qabsashada. Sida caadiga ah waxbarsahda la qabsashada ah waxaa ku jira barashada afka Finnishka ama Iswiidhishka. Waxbarashada waxaad ku baranaysaa bulshada Finnishka ah, dhaqanka iyo nolosha shaqada.

# Nolol maalmeedka dalka Finland

## Akawn ka furashada bangiga

Waxaad u baahan tahay bangi akawn si aad ku maamushid lacagtaada.Si hadaba taasi kuugu suuro gasho waxaa wanaagsan inaad is barbar dhig ku samaysid bangiyada iyo adeegyada ay bixinayaan, si aad u kala dooran kartid ka dani kuugu jirto iyo ka kale.

Markaad furanaysid bangi akawn, waxaad u baahan tahay baasaboor, kaarka aqoonsiga ee ajaanibta ama aqoonsi kale oo rasmi ah. Hadii aanad haysanin baasaboorti ama kaarka aqoonsiga ee ajaanibta, waxaa wanaagsan inaad hubiso nooca aqoonsi ee ay aqbali karaan bangiyadu.Mararka qaar bangiyadu waxay aqbalaan baasaboorka ajaanibka ee ay bixisay dawlada Finland, waraaqadaha safarka ee qaxootiga, ama aqoonsi kale oo safar kuu suuro galin karta. Xaalada qaarkood bangigu wuxuu kaaga baahan karaa cadaymo kale, hadii baasaboorkaaga ama aqoonsigaaga uu ku qoran yahay, in aan lagu cadayn karin qofkaa tahay.

Markaad furanaysid akawn, waxaa dan kuu ah inaad dalbatid sidoo kale lambarka lagu galo internetka ee bangiga. Furitaanka laguu furayo lambarka internetka waxaad ku dhamaysan kartaa arimaha kale ee xafiisyada.Sikastaba ahaatee helida lumbarkani waxay maraysaa xeer adag si la mida akawnka oo kale. Xaaladaha qaar ma heli kartid lambarka bangiga ee internerka, xataa adiga oo le akawn.

## Kaarka aqoonsiga ajnabiga

Haddii lagu aqoonsado islamarkaasna si la aamini karo loo xaqiijiyay aqoonsigaada, boolisku waxey kuu ogolaan karaan aqoonsiga ajnabiga. Aqoonsigaada waxaa laga xaqiijin karaa dukumenti tilmaamaya aqoonsigaada qof ahaaneed. Haddii aadan heysan dukumenti noocaas ah, waxaa la isbarbar-dhigi karaa farahaada iyo faraha lagu keydiyay kaarka sharciga degitaanka ama kaarka joogitaanka. Waxaa kale oo lagaaga baahan yahay in aad:

- heysato sharciga degitaanka ama kaarka degitaanka oo shaqeynaya ama xuquuqdaada joogitaankaada oo la diiwaangeliyay;
- deegaan degmo ku leedahay Finland; iyo
- in macluumaadkaaga lagu keydiyay nidaamka macluumaadka dadka.

### Caymis

Degaanka dartiis waxaa dan kuu ah inaad qaadato caymiska guriga. Caymiska gurigu wuxuu kaa ka bayaa tusaale ahaan shilalka guriga ka dhaca, sida alaabta guriga la dhigto oo jabta iyo alaabahaaga kaleba. Kireeyayaasha guryaha ayaa inta badan waxay shuruud ahaan doonayaan, in guriga la geliyo caymiska guriga. Waxaa kuu wanaagsan in aad shirkado badan oo kala duwan weydiisato codsiga beec gaarista. Hadii aad isticmaasho baabuur aad leedahay, wuxuu sharcigu waajib kaaga dhigayaa inaad qaadato caymiska gaadiidka.

### Telefoon

Markaad ka iibsatid Finland khadka felefoonka, waxaad helaysaa namber finish ah. Khadka telefoonka waxaa bixiya shirkado badan. Markaad furanaysid khadka telefoonka, waxaad u baahan tahay, nambarka shakhsiga ee Finland, iyo waa inaad cinwaan ku leedahay Finland. Waxaa waajib kugu ah inaad soo bandhigto macluumaadkaaga biil bixinta, inaad bixisay biilkaagii, sidoo kale inaanad lahayn calaamada aamindarada. Wayna ahayn waxaa waajib kugu ah si aad khadka u furato inaad bixiso deebaaji ama lacag horumarin ah.

### Internetka

Gurigaaga xidhiidhka internerka waad heli kartaa, markaad heshiis la gashid adeeg bixiyayaasha. Qiimaha adeeg bixiyayaasha waa kuu dan inaad is barbar dhigtaa, ka hor intaadan heshiis galin.Finland waxaa ka shaqeeya shirkado badan, kuwaasi oo bixiya adeegyo kala duwan oo xidhiidhka internetka ah. Shirkadahan waxaad ka heleysaa tusaale ahaan mashiinada wax raadintae e shabakadda marka aad ku qorto barta qoraalka ee ”internetliittymä”. Farqiga qiimayaasha xidhiidhinta internetku wuu badan yahay.

## Heerka sicirka Finland

Finland, mushaaraadka, kharashka nolosha iyo canshuuurtuba waa kuwa celcelis ahaan ka sarreeya wadamada kale ee Midowga Yurub. Si kastaba ha ahaatee waxaa adeegyo badan lagu maalgeliyaa lacagta canshuurta, sidaas darteed ayeeyna qiimo ahaan u jaban yihiin dadka dalka deggan marka la barbardhigo wadamo badan oo kale.

## Turjubaan ma u baahan tahay?

Haddii ay qasab kugu tahay inaad la macaamisho saraakiisha Finnishka islamarkaasna aadan aqoonin Finnish ama Iswidish sidoo kale adiga iyo sarkaalkuna aadan isku luqad wada aqoonin waxaad dhacdooyinka qaarkoodkooda marka lagu jiro xaq u leedahay inaad turjumis. Markaas sarkaalka ayaa turjubaanka dalbaya turjumistana bixinaya.

Sarkaalku wuxuu qabanqaabin karaa turjumaadda islamarkaasna bixinayaa kharashka turjumista marka arrinta laga hadlayo ay tahay fulinta arrin ay bilowgeedi hore lahaayeen saraakiisha dowladu. Mar walba tani ma ahan mid suurtagal ah. Haddii aad turjubaan u baahan tahay sameynta la-qabsashada iyo qiimeynta bilowga dartood waxaa markaas waajibka dalbista turjubaanku wuxuu saaran yahay sarkaalka. Arrimta waxaad horay u sii weydiin kartaa sarkaalka.

Haddii aad dalbaneyso turjumaan islamarkaasna aad adigu iska bixineyso waxaad isticmaali kartaa turjubaan markasta oo aad u baahato.

Shaqada turjubaanku waa in uu turjumaa hadalada adiga iyo saraakiisha. Turjumaad wax aan aheyn turjumida kama qabto. Sidaas darteed arrimo kale adiga kaama caawin karo. Turjubaanku waa dhexdhexaad dhinacaada ama dhinaca saraakiishana ma jiryo.

Shirkado badan ayaa waxay bixiyaan adeegyada turjumista. Shirkadahan waxaad ka raadsan kartaa tusaale ahaan mashiinka wax raadinta ee internetka. Bogagga iskaashatada afnaqayaasha iyo turjumaanada ee Finland waxaa laga helaa mashiin wax raadin oo aad ku raadsan karto afnaqayaasha iyo turjumaanada.

## Ammaanka bulsho ee Finland

Ujeedada ammaanka bulshada ee Finland waa in dadka la siiyo nolol ku filan marka ay ku jiraan xaaladaha nololeed ee kala gedisan. Waxaad taageero dhaqaale u baahan kartaa tusaale ahaan haddii aad jirrato ama aad cunug dhasho. Waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmo, haddii aad ka shaqayso ama aad si joogto ah u deggan tahay Finland.

Halkan waxaa lagu sheegayaa ammaanka bulshada ee deegaanka ku salaysan, kaas oo ay Keladu qaabilsan tahay. Waxaa kale oo Finland ammaanka bulshada qaabilsan degmooyinka, qasnadaha shaqo la'aanta, laamaha hawgabka iyo laamaha kale ee caymisyada.

Keladu waxay kaalmooyin siisaa sida qoysaska carruurta leh, dadka shaqo la'aanta ah, ardayda, dadka naafada ah iyo dadka muddo dheer jirranaa ama baxnaano u baahan. Xaaladaha qaar marka lagu jiro waxaa Kelada laga codsan karaa kaalmada kharashka deegaanka ku baxa.

Haddii aad caymiska caafimaadka Finland ku jirto, waxaad heleysaa kaarka Kelada. Marka aad kaarka tusto waxaa farmashiyayaasha iyo xarumo caafimaad oo badan oo gaar loo leeyahay ka heleysaa magdhow dhinaca kharashka ah. Waxaa markaas lacagta lagaa rabo ka bixinaysaa qaynta adiga kugu soo aadday oo kaliya.

Sharciga ayaa lagu qeexay maalmooyinka Kelada sababaha lagu bixiyo. Kmarka aad codsato manfacyada, Kela ayaa soo baaraysaa in aad manfacyada xaq u leedahay. Tan waxaa saameyn ku leeyahay degitaanka joogtada ah iyo ka shaqeynta Finland. Marka ay Keladu go'aamineyso kaalmo, codsada kasta waxaa si shaqsi ah looga baaraandegayaa xaaladdiisa nololeed.

Xaaladaha nololeed iyo baahida kaalmo ee codsashadayaashu waa kuwa inta badan kala duduwan. Sidaas ayeeyna tirada kaalmooyinka iyo sababahooduba u kala bedelan yihiin. Xaaldaada si gaar ah u cadee marwalba.

## Xaqa u lahaanshaha anfacyada Kelada

Xeerka ugu horeeya waa in haddii aad Finland si joogto ah u deggan tahay, aad heli karto mafacyada Kelada. Sharciga ayaa qeexaya waxa loola jeedo joogto u degananaashaha.

Sidoo kale ka shaqeynta Finland ayaa xaq kuu siin karta manfacyada Kelada.

Xaq ma u leedahay kaalmooyinka? Arrinta waxaa saamayn ku leh, in aad Finland u soo guurayso

- adigoo ka soo guuraya waddan ka tirsan Midowga Yurub (EU) ama waddan ka tirsan aagga dhaqaalaha Yurub (ETA), Ingiriiska ama Switzerland ama
- waddan kale.

Waxa kale oo intaas dheer oo saameyn ku leh in aad heleyso manfacyada, in aad Finland ugu soo guureyso tusaale ahaan

- sidii shaqaale ama shirkadle oo kale
- arday oo kale
- xubin qoys ka mid ah
- shaqaale la soo diray.

### Xaq u yeelashada kaalmooyinka Keladu waxay ku xiran tahay Finland oo si rasmi ah loo deganaado ama laga shaqeeyo

Marka aad Finland u soo guurto, Kelada ayaa qiimeyneysa markasta inaad Finland ugu soo guurtay degis joogto ah oo ka duwan sida uu dhigayo sharciga ammaanka bulshada.

Haddii aan loo arko in u soo guuristaada Finland aysan aheyn mid joogto waxaad xaq u yeelan karaysaa inaad shaqadaada darteed ku hesho xaqa manfacyada Kelada.

## Dhalashada Finland

Waxaad dhalashada Finnishka codsan kartaa, markii aad buuxiso 18 sano, aad Finland si rasmi ah u deganayd muddo dheer oo ku filan, aad luuqadda Finnishka ama tan Iswidishka ugu hadli karto ama u qori karto si lagu qanci karo ama si la mid ah uu yahay heerka aqoontaada luuqadda dhagooleyaasha Finnishka ama tan Iswidhish, iyo in qofka aad tahay loo xaqiijiyey si la aamini karo. Intaas waxaa dheer shuruudo kale; Tusaale ahaan waa inaad cadeysaa meesha ay lacagta noloshu kaa soo gasho. Dhalashada waxaad sidoo kale u codsan kartaa carruurta aan qaangaarka ahayn oo aad adigu mas'uul ka tahay.

# 2.2. Shaqo iyo ganacsi

## Shaqo ka helista Finland

Haddii aad Finland shaqo ka raadinayso, indha-indhee boosaska shaqo ee bannaan, shabakado samayso, aqoonta sare u qaad toosna ula xiriira boosaska shaqo ee aad xiisaynayso. Waxaa kale oo wanaagsan in la barto luqada Finnishka ama Iswiidhishka.

### Boosaska shaqooyinka bannaan

Ka raadi boosaska shaqooyinka bannaan bogagga boosaska shaqada, jaraa'idyada iyo adeegyada warbaahinta bulshada (tusaale Facebook iyo LinkedIn). Bogagga boosaska shaqada waxaad heleysaa marka aad mashiinka xog-raadinta khaanaddiisa qoraalka ku qorto "avoimet työpaikat" (boosaska shaqooyinka bannaan).

## Sameyso shabakado aqoontaadana sii wado

Shabakaduhu waxey faa'iido u leeyihiin shaqo raadinta. Aqoonso oo ka faa'iideyso shabakaddaada. Macallimiinta, saaxiibada waxbarashada, dadka aad istaqaanaan, dadki aad horay isula soo shaqeyseenba waxey qeyb ka noqon karaa shabakaddaada.

Xajiso xirfaddaada, la soco dhacdooyinka iyo wararka laantaada aqooneed, ka qeybqaado waxbarashooyinka dhameystirka ah horumarina aqoontaadi hore.

## Baro finnish ama iswidhish

Marka aad luqada taqaano, waxaa kuu sahlan in aad shaqo hesho islamarkaasna aad hawlahaada ka qabsato bulshada Finniska ah dhexdeeeda. Waxaad finnishka ama iswidhishka ka baran kartaa koorasyo kala duduwan ama si iskaa ah internetka.

## Uga faa'iideyso warbaahinta bulshada shaqo raadinta

Adeeygada dadka ee Internetka sida Facebook iyo Linkedlin waa qalabka ku wanaagsan shaqo raadinta. Shaqo-bixiyayaal badan waxaa kale oo ay warbaahin ahaan u isticmaalaan Twitterka. Adeegyada waxaad ka raadsan kartaa macluumaadyada boosaska shaqooyinka bannaan, waxaad sidoo kale ka sameysan kartaa shabakado xirfadeed. Waxaad heli kartaa macluumaadyo muhiim ah oo ku saabsan waxqabadka ururo kala duduwan iyo arrimaha cusub ee laamo xirfadeedyo kala duduwan ama waxaad ka qeybqaadan kartaa wada-sheekeysiyada.

## Toos ula xiriir shaqo-bixiyayaasha

Toos ayaad ula xiriiri kartaa ururada aad xiiseynayso islamarkaasna weydiin kartaa haddii ay haayaan shaqooyin bannaan. Shaqooyinka bannaan intooda badan waa kuwa boosaska shaqooyinka bannaan ee qarsoon. Boosaskan shaqo lama soo geliyo codsiyada furan ee shaqo-bixiyayaashu waxey shaqaalaha ka raadsadaan shabakadahooda dhexdooda. Waxaad toos u wici kartaa shaqo-bixiyaha ama waxaad emayl ugu diri kartaa codsi shaqo oo furan. Waxaad sidoo kale inta badan codsiga furan ugu diri kartaa bogagga shabakadda shirkadda.

## Adeegyada shaqaaleynta

Waxaad sidoo kale shaqo ka raadsan kartaa shirkadaha bixiyaha adeegyada shaqaaleynta. Shaqadu waxey ahaan kartaa mid waqti gaaban socota laakiin waxaad ka heli kartaa waayo-aragnimo faa'iido leh adigoo ballaarinaya shabakadaada. Waxaad heshiis la geleysaa shirkad shaqo kuugu direysaa shaqo-bixiye kale. Waxaad sidoo kale shaqo joogto ah ku heli kartaa soo marista shirkaddan oo kale.

### Isu shaqaalee firiilaanserinimo ama ganacsade

Shaqada firiilaanserka waxaa loola jeedaa shaqo aad xiriir shaqo oo aan joogto aheyn ugu qabaneyso shaqo bixiyaal badan. Firiilaanserku waa in uu iskiis uga taxaddiraa arrimaha canshuuraha iyo lacagta hawlgabka.

### Xafiiska shaqada iyo xoogsashada iyo adeegyada shaqaaloobidda degmooyinku waxay kaalmeeyaan shaqo raadinta

Xafiiska shaqada iyo xoogsashadu yacni Xafiiska shaqada iyo xoogsashada (TE-toimisto) iyo adeegyada shaqaaloobidda degmadaada waxaad hagitaan uga heleysaa shaqo raadinta iyo macluumaad ku saabsan boosaska bannaan ee shaqooyinka iyo waxbarashada.

Haddii aadan shaqo heysan ama aad shaqo la’aan noqoto, shaqo laawe shaqo doon ah isaga diiwaangeli Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ugu dambeyn maalinta shaqo la’aanta ugu horeysa.

## Shahaadooyinka ajnabiga markii la keeno Finland

Haddii aad shahaado ka soo qaadatay dal kale, waxaad u baahan kartaa go’aanka aqoonsashada shahaadada, si aad Finland uga shaqeyso ama wax uga barato.

Xaalado badan marka lagu jiro, shaqo-bixiyaha goobta waxbarashada ama dugsiga tacliinta sare ayaa qiimeynaya nooca aqoon iyo xirfadeed ee ay shahaadadaada dibaddu ku siisay.

Waxaad u baahan tahay go’aanka aqoonsashada Maamulka waxbarashada ama hay’ad kale, haddii aad dooneyso in aad ka shaqeyso xirfadda la xeeray ama shaqo looga baahan yahay shahaadada tacliinta sare oo leh heer la og yahay.

Maamulka waxbarashada ayaad foomka elegtroonigga ee ku jira adeegga Opintopolku.fi uga codsan kartaa aqoonsashada shahaadada dibadda.

Sida uu qabo sharciga Finland, shaqooyinka oo dhan uma baahna aqoon gaar ah ama heer shahaado oo gaar ah. Tusaale ahaan shaqo-bixiyaha laamaha gaarka ah ayaa inta badan qiimeynaya in shahaadada dibaddu ay qofka siineyso aqoon shaqada ku filan.

Finland, xirfadaha qaarkood waa kuwa la xeeriyay. Xirfadahaan waa tusaale ahaan fiisiyoteraabiistaha, dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha, farmashiistaha, kalkaalisada caafimaadka, qareenka, xisaabiyaha, macallinka fasalka madduul sifeeyaha.

Hay'adaha laamaha kala qaabilsan ayaa go'aaminaya xaqa loo leeyahay ku shaqeynta xirfadda xeeran ama isticmaalka magaca xirfadda. Tusaale ahaan laamaha daryeelka bulshada iyo caafimaadka waxaa go'aan ka gaara Valvira laanta waxbarashadana Maamulka waxbarashada. Go'aanku waa lacag.

Haddii aad shahaado xirfadeed ka soo qaadatay dibadda, waxaad bayaan uga codsan kartaa Maamulka waxbarashada. Bayaanka waxaa lagu sharraxayaa heerka shahaadada iyo waxyaabaha ka kooban tahay iyo shaqooyinka ay shahaadadu kuu siineyso aqoon ahaan si aad uga shaqeyso wadanka aad ka soo qaadatay. Si kastaba ha ahaatee bayaanku kuma siinayo aqoon aad uga shaqeyso Finland xirfad la xeeray.

## Xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha

Finland dhexdeeda shaqaaluhu wuxuu leeyahay xuquuq:

- inuu helo mushaar waafaqsan heshiiska shuruudaha shaqada iyo shuruudaha kale ee ugu hooseeya
- inuu badbaado ka helo sharciyada iyo heshiisyada
- inuu ku biiro urur shaqaale
- inuu helo deegaan shaqa oo caafimaad iyo nabadgelyo leh

Shaqaalahana waxaa saaran waajibaad:

- inuu shaqada si taxader leh u guto
- inuu ilaaliyo waqtiyada shaqada ee lagu heshiiyey
- inuu raaco waxyaabaha ay madaxda shaqadu faraan
- inuu diido dhinacyada tartanka kula jira shaqa-bixiyihiisa
- inuu xafido sirta ganacsiga iyo xirfadda
- inuu tixgeliyo waxa ay danta shaqabixiyuhu ku jirto

### La talinta xiriirka shaqada ee dadka waddanka u soo guurey

Haddii aad qabtid su'aalo ama dhibaatooyin la xiriira xagga xiriirka shaqada, waxaad la xiriiri kartaa la talinta xiriirka shaqada ee dadka waddanka u soo guurey. La talinta waxaa bixinaya xarunta dhexe ee ururada xirfadlayaasha Finland ee marka la soo gaabiyo loo yaqaan SAK. La talin waad heli karaysaa xitaa haddii aadan ururka xubin ka ahayn. Sharci yaqaanku wuxuu tusaale ahaan ka jawaabayaa heshiiska shaqada, mushaarka ama su'aalaha la xiriira waqtiyada shaqada. La talin bilaash ah ayaad ku heleysaa luuqadaha Finnishka ama Ingiriiska.

# Shuruudaha xiriirka shaqada iyo mushaarka Finland

Xuquuqda shaqaalaha waxaa Finland lagu qoray sharciga heshiisyada shuruudaha shaqada. Waxaa lagu heshiiyay tusaale ahaan mushaarka, wakhtiga shaqada, fasaxyada iyo shuruudaha kale. Marka meel cusub ka shaqo billowdo, waxaa wanaagsan in shaqo-bixiyaha lala galo heshiiska shaqada oo qoraal ah, kaas oo lagu qorayo dhammaan shuruudaha xiriirka shaqada.

## Fasaxa sannadka

Sida uu qabo sharciga fasaxa sannadku, shaqaalaha jooga Finland wuxuu xaq u leeyahay fasaxa sannadka ama magdhowga fasaxa. Tirada maalmaha fasaxa sannadka iyo mushaarka ama magdhowga fasaxa ee la bixiyo wakhtiga fasaxa waxaa xisaabintooda lagu saleeyaa sharciga fasaxa sannadka iyo shardiga heshiiska shaqada ee qabta shaqo-bixiyaha. Ka hubi shuruudaha heshiiskaada shardiga shaqiga ama weydii qofka goobtaada shaqada u qaabilsan arrimaha shaqaalaha.

## Caafimaadka iyo Badbaadada shaqaalaha

Dalka Finland muhiimad weyn ayaa la siiyaa nabadgelyada shaqada. Shaqa-bixiyaha ayaa ka taxadara sidii shaqaaluhu ay shaqadooda u qabsan lahaayeen si nabadgalyo leh. Shaqaaluhu waa in uu isna ku dadaalo, in shaqadiisa u qabto si ammaan ah islamarkaasna uu raaco tilmaanbixinnada shaqada.

## Haddii aad jirato

Haddii aad jirato ama uu shil kugu dhaco, waxaad xaq u leedahay inaad ka maqnaato shaqada. Shaqo-bixiyaha waxaa waajib ku ah in uu waqtiga jirada mushaar kaa siiyo. Haddii aad jirrato, u sheeg madaxdaada qofka madaxda kuu ah.

## Fasaxyada qowska

Markii ay qoyska ilmo u dhashaan, waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay qaataan fasaxa qoyska, ayna ilmaha guriga ku haystaan.

Horay u ogeysii shaqo-bixiyahaada ugu yaraan labo bilood fasax qoyska ka hor. Haddii aad shaqo la'aan tahay, fasaxaada qoysku ku wargeli Xafiiska shaqada iyo meherrada ama adeegyada shaqaaloobidda ee degmadaada.

Fasaxyada qoysku inta badan waa fasaxyo mushaar la'aan ah. In mushaar lagaa siiyo waqtiga fasaxa qoysku wuxuu ku xiranyahay heshiiska shuruudaha shaqadaada. Arrinta ka hubso shaqo-bixiyahaada.

# Shahaado shaqo

Qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay inuu helo shahaadada shaqada markii heshiiska shaqodu uu dhamaado, haddii uu codsado.Shahaadada shaqodu waa waraaq muhiim ah, taasoo ay ku cad yihiin inta ay shaqodu socotay iyo hawsha la qabtay intii shaqodu socotey. Sidoo kale shaqaaluhu wuxuu codsan karaa in shahaada lagu qoro sababaha heshiiska shaqadu u dhamaaday iyo sidoo kale qiimeynta xirfada shaqo iyo hab dhaqanka qofka shaqaalaha ah.

# Shirkad ganacsi ku samaynta Finland

Shirkad waad ka samaysan kartaa Finland kumana xirna jinsiyaddaada. Muhiimaddu waa in aad heysato xaqa joogitaanka Finland, aqoonta xirfadeed ee loo baahan yahay iyo aqoon afka Finnishka ah oo kugu filan.

## Talo weydii talobixinta ganacsiga

Finland, qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo talobixin ganacsi oo lacag la'aan ah. Talobixinta waxaa bixiya tusaale ahaan:

- Xarumaha shirkadaha cusub
- Xarunta deegaanka, gaadiidka iyo shaqooyinka (Xarumaha ELY)
- Xafiiska shaqada iyo dhaqaalaha (Xafiisyada TE)
- Ganacsi Finland ( Bogagga internetka iyo telefoonka)

Marka aad hesho aragti ganacsi oo wanaagsan, la xiriir xarunta adeegga shirkadaha ee kuugu dhow. Khubrada halkaas joogta ayaa kaa caawinaya horumarinta fikradda ganacsiga, baaritaanka suuqa, xisaabinta faa'iido lahaanshaha iyo sahminta maalgelinta. Kaalmo ayaad sidoo kale ka heleysaa marka aad ka fikireyso sameysashada shirkad.

# Canshuurid

Finland waxaad mushaarka iyo dakhliyada kale ka bixinaysaa canshuur. Tirada canshuurtaadu waxay ku xiran tahay, inta uu dhanyahay dakhliga ku soo gala. Haddii Finland u timaado shaqo adigoo dibadda ka yimid waxaa canshuurtaada saamayn ku leh, muddada aad Finland joogayso iyo in shaqo-bixiyahaadu yahay shirkad Finnish ama ajnabi ah.

Waxaa kale oo canshuur laga bixiyaa lacagta mushaar ahaan kuu soo gasha iyo dakhliga raasumaalka. Habab kala duwan ayaa loo canshuuraa dakhliga mushaarka iyo dakhliga raasumaalka. Dakhliga raasumaalku waa dakhli ka soo uruuro hantida. Dakhliyada kale waa kuwa mushaar oo kale ah.

Ka sokow dakhliyada mushaaraadka waxaad Finland canshuur ka bixinaysaa tusaale ahaan dakhliyadan soo socda:

- magdhowga shaqada
- dakhliga shirkadda
- kaalmooyinka bulshada oo kala duwan sidan lacag maalmeedka shaqo la'aanta, lacagta maalmeedka waalidka iyo kaalmada waxbarashada
- hawlgabka
- dakhliga raasumaalka sida dakhliga kiro kaa soo gala ama faa'iidada laga helo hanti la wareejiyay

Dowladda iyo degmooyinku waxay lacagaha canshuurta ku bixiyaan tusaale ahaan:

- daryeelka caafimaakda
- waxbarashada
- barbaarin-horaadka
- difaaca dalka.

Finland canshuurta dakhliga mushaaraadku waa mid tallaabo-tallaabo u kororta. Taasi waxaa looga jeedaa, in mushaarka badan laga bixinayo canshuur ka badan tan laga bixinayo mushaarka yar. Boqolkiiba inta canshuurta loo jarayo waxay sheegeysaa, inta ay dhantahay canshuurta aad mushaarkaada ka bixinayso. Finland qofkasta goonidiisa ayaa loogu xisaabiyaa. Dakhliga lamaanahaadu saamayn kuma lahan cashuurta boqolkiiba inta lagaa qaadayo. Waad qiimayn kartaa cashuurta boqolkiiba inta aad bixinayso adiga oo isticmaalaya qaab xisaabeedka xafiiska cashuuraha.

Haddii aad mushaar qaadato, shaqo-bixiyahaada ayaa caddadka canshuurta si toos ah uga jaraya mushaarkaada kaddibna u sii gudbinaya canshuur qaadaha. Sidaasi darteed shaqo bixiyuhu wuxuu kaaga baahan yahay kaarka canshuurta Kaadhka cashuurta. Kaarka canshuurta waa dukumenti sheegayaa boqolkiiba inta ay canshuurtaadu tahay. Maamulka canshuuruhu wuxuu xisaabinayaa sannad kasta kaddib in aad dakhligaada ka bixisay canshuur ku filan. Haddii aad bixisay canshuur badan, waxaad heleysaa canshuur celin. Haddii aad bixisay canshuur yar, waa in aad inta kugu maqan u bixisaa sidii canshuur haraa ah oo kale.

Ka hubi xisaabta mushaarka iyo ogeysiiska canshuurta, in shaqo-bixiyahaadu uu mushaarkaada ka reebay canshuurta una gudbiyay canshuur qaadaha. Kaydso warqadaha mushaarka.

Haddii aad Finland joogayso mudo ka badan lix bilood, waxaa waajib kugu ah inta badan inaad Finland siiso canshuurta dakhliga ku soo gala oo dhan. Tani waxay xittaa quseysaa dakhliyada dibadda kaa soo gala. Sidoo kale waxaa waajib ah inaad ku bixiso Finland caymisyada khasabka ah. Haddii uu shaqo-bixiyahaadu yahay Finnish, boqolkiiba canshuurta laga jarayo mushaarkaadu waxay ku salaysantahay dakhliga sannadka oo dhan ku soo gelaya. Boqolkiiba inta canshuurta loo jarayo waxay badan tahay marka uu mushaarkaadu badan tahay. Waxaad u baahan tahay summadda aqoonsiga ee Finnishka iyo kaarka canshuurta.

# Haddii aad shaqo la'aan noqotid

## Isu diwaangeli shaqo laawe shaqo raadinaya

Waa inaad Xafiiska shaqada iyo xoogsashada islamarkiiba iska diinwaageliso, haddii aad shaqo la'aan noqoto. Iska diiwaangeli sidoo kale haddii shaqada wakhti cayiman lagaa fasaxo, waxbarashadaada ama shaqadaadi musharkeeda la taageerayo ay dhammaato. Kaalmada shaqo la'aanta waxaad heleysaa oo kaliya wakhtiga ay shaqo raadintaadu ka shaqaynayso.

Diiwaangeli shaqo raadintaada adigoo isticmaalaya adeegga shabakadda ee adeegyada Xafiiska shaqada, tegaya Xafiiska shaqada ee kuugu dhow ama telefoon u diraya. Habka is-diiwaangelinta waxay ku xirantahay waddanka aad u dhalatay. Waxaad telefoonka isaga diiwaangelin kartaa, haddii aad horay macaamil uga ahayd Xafiiska shaqada. Markaas jinsiyaddaadu wax saamayn ah ma lahan.

### Haddii aad tahay muwaadin waddan Midowga Yurub ama ETA ah

Waxaad iska diiwaangelin kartaa shabakadda adeegyada Xafiiska shaqada, haddii aad tahay muwaadin waddan Midowga Yurub ama ETA. Ku gal bogga shabakada sumadda lambar bankiyeedka Finnishka ama kaarka aqoonsiga ee magnedka leh. Adiga lagaagama baahna inaad wacdo ama aad tagto xafiska TE-ga, haddaan markaas si gaar ah laguugu yeerin.

Haddii aadan laheyn sumadda labarka bankiga iyo kaarka aqoonsiga magnadka leh, isaga diiwaangeli shaqo doone xafiiska shaqada iyo xoogsashada (TE-toimisto) ee kuugu dhow.

### Haddii aad tahay muwaadin waddan kale oo aan Midowga Yurub ama ETA ahayn

Diiwaangeli shaqo raadintaada adigoo isticmaalaya foomka isdiiwaangelinta shabakadda ee adeegyada Xafiiska shaqada, haddii aad tahay muwaadin waddan kale oo aan ahayn Midowga Yurub ama ETA. Haddii aad horay macaamiil

uga ahayd Xafiiska shaqada, telefoonka isaga diiwaangeli. Si aad shaqo raadiye ahaan isugu diiwaangeliso, waxaad u baahan tahay sharciga deganaanshaha oo shaqeynaya.

Haddii aadan foomka ku buuxin karin shabakadda, tag si aad isaga diiwaangeliso Xafiiska shaqada ee kuugu dhow.

Marka aad tegeysid Xafiiska shaqada, horay u sii qaado:

- dhammaan shahaadooyinka shaqada iyo waxbarashada
- aqoonsi
- sharciga deganaanshaha oo shaqaynaya.

### Ka codso kaalmada shaqo la'aanta kaasada shaqo la'aanta ama Kelada

Marka aad isu diiwaangeliso in aad tahay shaqo la'aan shaqo doon ah, Xafiiska shaqada iyo meherada ama adeegyada shaqaaloobidda ee degamadaada ayaa baaraya macluumaadyada aad bixisay. Waxay ka salgaarayaan in aad buuxisay shuruudaha kaalmada shaqo la'aanta lagu bixiyo iyo in kale, waxayna qorayaan bayaan ku saabsan in aad lacagta kaalmada shaqo la'aanta xaq u leedahay iyo in kale. Waxaa kale oo ay bayaanka u dirayaan qolada kaalmada dhaqaale ku siinaysaa, yacni qasnadda shaqo la'aanta ama Kelada. Bayaankan la'aantiisa ma heli kartid kaalmada shaqo la'aanta.

## Dhaqanka Finnishka

Nolosha shaqada ee Finnishka waxaa ku jira xeerar badan, kuwaas oo ay qasab tahay in shaqaalaha iyo shaqo-bixiyuhuba ay u hoggaansamaan. Sharciga degsan iyo heshiiska shuruudaha shaqada ayaa qeexaya tusaale ahaan mushaarka ugu hooseeya, wakhtiyada shaqada, fasaxyada, mushaaraadka wakhtiga jirrada iyo shuruudaha ruqsaynta ama shaqo ka eryidda.

### Sinnaanta iyo caddaalada shaqada

Sida uu qabo sharciga Finland, nooc kasta oo takoor ah waa ka mamnuuc goobaha shaqada. Shaqo-bixiyuhu waa in uu ka taxadiraa in cadaaladda iyo sinnaanta jinsiyadu ay ka hirgalaan goobta shaqada.

### Is adeejinta iyo masuuliyad qaadashada

Sida badan qaybsiga shaqada waxaa looga heshiiyaa shirarka guud wixii lagu heshiiyeyna waa in la fuliyaa. Qofka madaxda ahi wuxuu shaqaalaha u dhiibaa shaqooyinka, qaabkii uu u qaban lahaana waxaa loo daayaa oo go'aan ka qaata qofka shaqaalaha ah. Haddii uu qofku aqoon waayo sidii uu shaqada u qaban lahaa ama uu qaban kari waayo wuxuu si toos ah hagitaan waydiisaan karaa shaqaalaha kale ama madaxdiisa.

## Aaminaada iyo dhawrida jadwalka shaqada

Dhaqanka shaqada ee Finnishka waxaa muhiim ah in la ilaaliyo wixii lagu heshiiyey. Haddii waxa la wada go'aansado, shaqaalaha iyo shaqo-bixiyuhuba waxay u qaadanayaan in qof kastaa qabanayo wixii lagu heshiiyey.

Finlad waxaa muhiim ah in la ilaaliyo waqtiga. Shaqada waa in la yimaadaa waqtigii lagu heshiiyey oo go'an. Saacada 8.00 macnaheedu waa 8.00 ee maaha 8.10. Daahidu waa ixtiraam la'aan, sababtoo ah dadka kale waxay ku qasban yihiin inay sugaan qofka soo daahay. Haddii aad og tahay inaad soo daahayso u sii sheeg daahidaada qofka madaxda kuu ah.

Shaqooyin badan ayaa waxay leeyihiin waqti soo gelid shaqo oo u dhaxaysa 7–9 iyo ka bixid shaqo 15–17 inta u dhaxaysa. Haddii shaqadaadu ay sidaan dambe oo kale tahay, qofka shaqaalaha ah asagaa si fiican ugu taxadaraya inuu shaqeeyo waqtigii loogu talogalay oo ku waafaqsan heshiiska shaqada.

## Qaabka layskula xiriiro

Finnishku si toos ah ayey u hadlaan, toos u hadliduna maaha xushmad daro. Hadalka tooska ah waa ka caadi goobaha shaqada ee Finnishka. Haddii tusaale ahaan waqtigu uusan ku filnayn in shaqada lagu dhameeyo, waxaa wanaagsan in si toos ah loogu sheego qofka madaxda ah. Shirarka iyo wada tashiyada waxaa si toos ah loo abaaraa ajandaha marka la is nabdeeyo kadib.

Habka la isula hadlo ee dhaqanka shaqada ee Finnishku waa mid aan rasmi aheyn.Goobo shaqo oo badan waxey dhammaan shaqaaluhu isugu yeeraan magaca koowaad iyagoo aan eegeyn derajada.

## Saamaynta diintu ay ku leedahay shaqada

Dad badan oo Finnish ah waa Kirishtaan laakiin ma ahan dad aad diinta ugu dheggan. Si kastaba ha ahaatee waxay weli dhaqan ahaan u ilaaliyaad caadooyin diimood faro badan. Saamaynta diintu ay kuleedahay shaqada waxay ka muuqataa fasaxyada shaqaalaha.Maalamaha ciddiha kirishtanka ah, ciida kirismaska iyo ciida kirishtaanka ee maalintii nabi Ciise kor loo qaaday (pääsiäinen) waa ciido sharciga Finlad ku qoran.

# 2.3. Luqada Finnishka iyo Iswidishka

## Maxaan u baranayaa Finnishka ama Iswidishka?

Afka Finnishka waxaa ku hadla oo uu luqadooda hooyo yahay qiyaastii 87 % dadka Finnishka ah. Afka Iswidishka waxaa ku hadla oo uu luqadooda hooyo u yahay qiyaastii 5 % dadka Finnishka ah.

Markaad ka fikiraysid, ma ii dan baa inaan barto luuqada finishka ama iswidhishka, waxaad ku darsataa qorshaha luuqada ay ku hadlaan dadka dagan meesha aad dagan tahay iyo deegaanada kugu hareeraysan ama xeeran.

Goobaha shaqo badankood waxaan laga maarmin aqoonta Finnishka. Haddii aad dooneyso in aad wax ka barato Finland, waa iska caddahay in aad u baahan tahay aqoonta afka Finnishka.

Waxaa haboon in aad barato Finnishka ama Iswidishka haddii aadan ku fekersaneyn xitaa inaad dalka deganaato mudo dheer. Inkastoo afka Ingiriiska Finland ku dhowaad si fiican looga yaqaan, hadana aqoonta afka Finnishka ama Iswidishka ayaa wax badan kaaga faa'iido badan.

Marka aad taqaano luqada waa kuu sahlan tahay in aad ku raaxeysato islamarkaasna la qabsato Finland. Waxaa kuu sahlan in arrimahaada aad ka dhameysato saraakiisha, la socoto wararka, dad barasho iyo in aad saaxiibo hesho.

Sida ugu fiican ee aad luqad ku baraneysaa waa inaad ku dhiirato ku hadalkeeda. Mar kasta uma baahnid inaad fahamto dhammaan, waxaa kugu filan inaad fahamto arrimaha ugu muhiimsan. Si geesinimo leh u gal goobaha aad ku hadli karto afka Finnishka ama Iswidishka.

## Barashada afka Finnishka

Waxbarasahda afka Finnishka ee dadka waaweyn waxaa qabanqaabiya tusaale ahaan machadyada aqoon-kororsiga dadka waaweyn, degmooyinka iyo adeegytada Xafiiska shaqada iyo Meheradaha. Koorasyada la bixiyaa waa noocyo badan yihiin koorasyo ku habboon waalidiinta guri-joogtada ah, dadka shaqeeya iyo dadka shaqo la'aanta ah.

Haddii aad shaqo la'aan tahay, waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay waxbarashada luqadda iyo adeegyada kale ee uu qabanqaabiyo Xafiiska shaqada iyo meheradaha. Faahfaahin dheeraad ah weydii Xafiiska shaqada iyo meheradaha ama adeegyada shaqaaloobidda ee degmadaada.

Waxaad afka Finnishka u baran kartaa qaab wada sheekeysi ah. Maktabado iyo ururo badan ayaa qabanqaabiya kafateeriyada luqadda iyo kooxaha wada sheekeysiga, halkaas oo aad ku baran karto ku hadalka Finnishka.

## Luqada Finnishka ee internetka ku jirta

Shabakadda waxaad ka heleysaa koorasyo badan oo luqadda finnishka ah, kuwaas oo heer ahaan kala duwan. Waxaad ka fiirsan fiidiyowyo, waxaad ka dhegeysan kartaa podcast ama waxaad ka soo degsan kartaa ablikeeshinno. Waxaad ka baran kartaa naxwaha iyo erayada, waxaad ka sameyn kartaa laylisyo waxaad sidoo kale ku ciyaari kartaa ciyaaro. Luqadda wax baridda ee agabka waxbarashadu inta badan waa afka finnishka ama ingiriiska.

Finnishka waxaad sidoo kale ku baran kartaa koorasyada shabakadda, macluumaadkooda waxaad ka heleysaa adeegga Finnishcourses.fi

## Shahaadada rasmiga ah ee aqoonta luqada

Haddii aad doonayso in aad codsato dhalashada Finland, waxaad u baahan tahay shahaadada rasmiga ah ee aqoonta luqada Finnishka ama Iswiidhishka. Aqoonta luqadeed ee la isaga baahan yahay waxaad sidoo kale ku muujin kartaa luqadda dhagoolaha ee Finnishka ama Iswiidhishka. Shahaadadu waxay inta badan faa'iido kuu leedahay marka aad codsanayso shaqo ama waxbarasho.

Aqoonta luqada waxaad ku muujin kartaa:

- imtixaanka luqada ee guud
- imtixaanka luqada ee maamulka dowladda

Aqoonta luqadeed ee ku xiran jinsiyadda waxaad ku muujin kartaa shahaadada iyo shahaadada dhammaynta waxbarashada ee uu Hoggaanka socdaalku aqbalsan yahay.

Shahaadada aqoonta guud ee luqadda, yaci YKI waa tijaabada luqadeed ee dadka waaweyn, taas oo cabirta aqoonta luqadeed ee nololmaalmeedka la xiriirta. Mtixaanku waa lacag. Imtixaanka waxaad ka heleysaa shahaado sheegeysa heerkaada aqooneed ee luqada.

Haddii aad rabto inaad ka shaqeyso maamullada shacabka waxaad sida caadiga ah u baahan tahay shahaadada aqoonta luqadda Finnishka ama Iswidishka. Imtixaanka guud ee luqadda ama shahaadada luqadda ee dowliga ah ayaad ku soo bandhigi kartaa aqoontaada luqada Finnishka ama Iswidishka.

Marka shaqada ama goobta waxbarashada codsanayso, weydii qofka shaqada ku siinaya ama machadka waxbarashada aqoonta luqadeed ee lagaaga baahan yahay. Ka hor inta aadan iska qorin imtixaanka luqadda, waa in aad ogtahay heerka aqoonta ee aad shahaadada ka doonayso.

# Luuqadda Iswidishka Finland dhexdeeda

Finland waxaa ka jira laba luuqadood oo rasmi ah, Finnish iyo Iswidish. Dalka Finland dhexdiisa waxaa luuqadda Finnishka afkooda hooyo ahaan ugu hadla qiyaastii 87% ka mid ah dadka Finnishka. Iswidishka waxaa afkooda hooyo ahaan ugu hadla qiyaastii 5% ka mid ah dadka Finnishka. Luuqadda Iswidishka waxaa inta badan looga hadlaa xeebaha galbeed iyo kuwa koofureed ee Finland.

Luqada Iswiidhishka waxaad isticmaali kartaa marka aad la macaamilayso saraakiisha Kelada ama Xafiiska shaaqada. Waxaad sidoo kale dib dambe ka beddeli kartaa luqadaada da-qabsashada.

## Dal kula qabsashada luuqadda Iswidishaka

Waxaa laga yaabaa inay adiga kuu tahay fursad wanaagsan dal kula qabshashda luuqadda Iswidishku tusaale ahaan haddii:

- Aad degantahay aag, ay degan yihiin dad badan oo luuqadda Iswidishka ku hadla.
- Ay jiraan xubno qoyskaaga ka mid ah oo Iswidish ku hadla ama qaraabo kale.
- Aad xoogaa ka taqaano luuqadda Iswidishka.

Waxaa laga yaabaa in luuqadda Iswidishku ay faa'iido kuu leedahay markii aad raadineyso shaqo. Si kastaba ha ahaatee la soco, in goobaha shaqada intooda badan looga baahan yahay aqoonta luuqadda Finnishka. Haddii xitaa aad luuqadda dal laqabsiga u dooratid luuqadda Iswidishka, waxaa kula gudboon inaad mar uun sidoo kale aad baradid luuqadda Finnishka.

Degmooyinka qaarkood waxaad ka qayb geli kartaa waxbarashada dal la qabsiga oo luuqadda Iswidishka ku baxaysa. Haddii aad heliweyso waxbarashda dal laqabsiga oo luuqadda Iswidishka ah, markaas xaaladaha qaarkood waxaa suurtogal ah in lagaa kaalmeeyo barashada luuqadda Iswidishka ee aad adigu iskaa u raadsatay, haddii arintaan horay loogu heshiiyey markii la sameynayey qorshahaaga dal laqabsiga iyo shaqada. Weydii dal la qabsiga luuqadda Iswidishka, marka adiga laguu sameynayo kaarteynta hore iyo qorshaha dal la qabsiga. Sharcigu siduu qabo waxaad xaq u leedahay inaad luuqad dal la qabsi u dooradit Finnish ama Iswidish.

# 2.4. Deganaanshaha

## Deganaanshaha Finland

Finland waa mid ka mid ah wadamada dunida ugu ammaanka badan, deegaannada Finland oo dhanna waa kuwa nabad ah oo la degi karo. Guryuhu waa kuwa si fiican loo qalabeeyay sannadka oo dhanna diiran, bey'aduna waa mid magaalooyinka u dhow. Gaadiidka dadweynuhu si wanaagsan ayeey magaalooyinka uga dhex-shaqeeyaan.

Farqiga dakhliga dadku waa mid ka yar kan wadamo kale oo badan ka jira. Tan waxay ka muuqataa xittaa degitaanka: farqiga deegaannada kala duwan u dhexeeyaa ma ahan mid aad u weyn oo lamid ah sida kan ka jira wadamada farqiga weyn ee dakhligu uu ka jiro.

## Guri kiro

Finland badi dadku waxay deggan yihiin guryo kiro ah. Guriga kirada waxyaabuhuu ku wanaagsan yahay waa in, markaad rabto guriga inaad ka guurto ood badelato way sahlan tahay, sababtoo ah uma baahnid inaad iibiso gurigii si aad mid kale u iibsato. Waxaa suurotagal ah inuu kaa kireeyaha guriga ku yiraahdo waa inaad iiga baxdaa guriga, haddii uu wato sababeyn la aqbali karo. Waa inaad ka guurtaa gurigii, xitaa haddaadan rabin inaad guurto.

Waqti dheer kahor u diyaar garow raadsashada guri kiro ah. Meelaha qaar waa meelo dadku wada jecel yihiin adagna sida lagu helo. Meelahaasna dhaqso ayaa lagu kireystaa. Markii aad hesho guri kiro kugu habboon, waxaa wanaagsan inaad dhaqso go'aanka ku gaarto, inaad qaadaneyso gurigaas.

Marka shaqsiga ama shirkada guri kiraynaysaa ay dooranayso cida ay guriga ka kiraynayso uguma kala eexan karto dadka guriga soo dalbaday diin, dhalasho, jinsiyad iyo waxyaabaha la midka ah. Arinkaasi waa qodob sharciga ku yaala.

### Sideen ku raadsadaa guri kiro ah?

Markaad raafadsaneyo guri kiro ah waxaad wixii ka heli kartaa tusaale internetka. KU qor netka markaad ka raadineyso "vuokra-asunto". Xitaa xogta wargelinta guryaha waxaad ka heli kartaa wargeysyada magaalada.

Haddii aad tahay muwaadin u dhashay Finland ama dal kale oo Midowga Yurub ah ama aad haysato sharciga deganaanshaha oo ugu yar sannad shaqaynaya, waxaad codsan kartaa guryaha kirada ah ee ay dowladdu taageero, guryaha ARA. Guryaha waxaa kireeya tusaale ahaan shirkadaha guryaha ee degmooyinka.

### Guryaha kirada ee shaqsiga

Guryaha kirada ee shaqsiga waxaad inta baddan lagu helaa dhaqso markii loo fiiriyo guryaha kirada ee degmada. Inta baddan guryaha kirada ee shaqsiga waa qaali.

Uma baahnid inaad isticmaasho dallaal marka aad guriga raadineyso. Adiga nafsad ahaantaada ayaa raadsan kara macluumaadka la xiriira guryaha bannaan. Hadaad saas yeesho hadhow lagaama rabo inaad bixiso mushaarka dallaalka (välityspalkkio).

### Guryaha kirada ee degmada

Degmooyin badan ayaa leh guryo la kireeyo. Waa kuwa inta badan ka raqiisisan guryaha kale ee kirada ah. Guryaha kirada ah ee ay degmooyinku leeyihiin waxaa kuwa sida caadiga ah lagu dhisay taageerada dowladda. Markaas waxay yihiin guryaha ARA.

Waxad dalban kartaa guri kiro ah oo ah kuwa ay dowladu taakulayso haddii ad haysato mid ka mid ah waxyaabahan xiga:

- Muwaadinnimada Finland;
- xaq dagganaansho oo la diwaangeliyay;
- kaadhka sharciga dagganaanshaha;
- sharciga dagganaanshaha oo shaqaynaya ugu yaraan sanad; ama
- sharciga dagganaanshaha ee ardayga.

Markii aad rabto inaad degmada guri kiro ah ka dalbato, ka buuxso foomka codsiga guryaha xafiiska guryaha ee degmadaada. Inta baddan waad ka buuxsan kartaa foomka shabakada degmada.

Guryaha ARA waxaa loogu talaggalay dadka leh hanti yar gurina si degdeg ah ugu baahan. Waxaa kale oo ay degmooyinku yeelan karaa guryo kiro ah oo aan ahayn kuwa taageerada dowladda lagu dhisay.

## Caymiska guriga

Kireeyayaasha guryaha Finland oo badan ayaa waxay shuruud ahaan doonayaan, in marka aad guri ka kireysanayso aad gasho qaadato caymiska guriga. Caymiska gurigu wuxuu magdhabayaa tusaale ahaan waxyeellada soo garta alaabtaada guriga iyo alaabahaada kale. Waxaa kuu wanaagsan in aad shirkado badan oo kala duwan weydiisato codsiga beec gaarista. Caymisku ka ahaado mid shaqaynaya inta aad guriga deggan tahay oo dhan.

## Heshiiska kirada

Marka aad Finland guri ka kireysanayso, markasta samee heshiiska kirada oo qoraal ah. Heshiishka waxaa ku jira tusaale ahaan kirada bisha, dibaajiga kirada iyo sida heshiiska kirada loo joojin karo.

Toistaiseksi voimassa oleva vuokrasopimus waxaa uu jirayaa inta uu kireeyaha ama kireystahu uu heshiiska ka noqonayo. Haddaadan horey u ogeyn, mudadda aad dagenaaneyso guriga heshiiskaas ayaa ah midka kugu habboon.

Määräaikainen vuokrasopimus waxaa loola jeedaa, in kireystaha iyo kireeyaha ay ku heshiiyaan markiiba, goorta heshiisku ku eg yahay. Xiliga heshiiska kiraduna wuxuu ku eg yahay taariikhda markaa lagu heshiiyey, iyadoon u baahneyn wax heshiis kabax kale. Haddii aad rabto inaad sii degenaato gurigii waxaad u baahan tahay heshiis kiro cusub.

Ijaarka guriga waa inaad bishii mar bixisaa. Ijaarkana waa inaad ku bixisaa waqtiga lagu heshiiyey ugu danbeyn. Waqtiguna wuxuu ku qoran yahay heshiiska guriga. Ku bixi ijaarka akoonka meesha ku qoran. Ijaarka kuma bixin kartid kaar kareedhid ah.

U heyso ijaarka kadib lacag kharashaadka kale.

## Guri iibsasho

Guryaha dabaqa ah iyo kuwa gaagaaban ee halka sekked ku yaal waa guryaha saamiga ah. Waxay ku yaalaan daar ay leedahay shirkadda saamiga guryaha.

Marka aad iibsato guri aad leedahay, waxaad iibsanaysaa hanti maguurto ah. Hantida maguurtada ah waa guriga milkida iyo booska uu ku yaal.

Guryaha waxaa iibiya shaqsiyaad, shirkad dalaaleyda guryaha iyo shirkadaha dhisa Inta badana waxay guryaha iibka ah ogeysiiskooda soo geliyaan internetka iyo wargeys-yada. Markaad hesho guri, kaasood xiiseyneyso, waxaad kula heshiin kartaa gadaha guriga xiliga aad soo arki karto guriga. Mararka qaar wargelinta gadida guriga ayaa lagu qoraa xiliga lasoo arki karo. Markaa uma baahna inaad balan gooni u qabsato.

## Kaalmada ijaarka

Haddii uu yar yahay dakhliga ku soo gala islamarkaasna aad Finland u deggan tahay si rasmi ah, waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay kaalmada ijaarka ee Kelada. Waxaa taageero u codsan kartaa kirada, kharashka shirkadda saamiga iyo weliba kharashaadka biyaha iyo kululayska.

Deganaansho joogto ah waxaa loola jeedaa, in aad Finland ku leedahay guri rasmi ah inta badanna aad Finland joogto. Si aad u hesho kaalmada ijaarka, waa in aad sidoo kale xaq u leedahay kaalmooyinka Kelada.

## Xuquuqda iyo waajibaadka deganaha

Waxaa waajib kugu ah

- in aad u hoggaansatid xeerarka nidaamka ee shirkadda gurigaada, haddii aad deggan tahay guri dabaq ah ama guryaha dhinaca isku haaya. Xeerarka nidaamka waxaa ahaan sida caadiga ah ku qoran tusaale waqtiga ay tahay in buuqa la yaraayo. Waxaa sidoo kale inta badan ku jira tilmaamaha sida loo isticmaalayo goobaha dadka ka dhaxeeya uu gurigu leeyahay. Inta badan waxaa xeerarka nidaamka laga helaa guryaha dabaqa ah meesha laga soo galo ee albaabka bannaanka u dhow.
- in aad ka taxadirto in xittaa martidaadu ay u hoggaansamaan xeerarka nidaamka.
- in aad guriga u isticmaasho oo kaliya wixi loogu talagalay. Haddii guriga loogu talgalay in la dego,meel kale ma degi kartid iyo guriga kama dhigi kartid goob ganacsi.

Waxaad xaq u leedahay

- in aad nolol caadi ah ugu noolaato gurigaada. Shirkadda gurigu ma soo saari karto amarro ka soo horjeeda sharciga, ama aad u xadidaya nolosha caadiga ah.
- nabadgelyo guri. Deriskaadu tusaale ahaan qeylo badan habeenki saqda dhexe kuma qashqashaadi karaan deganaanshaha guriga. Haddii uu deriskaadu marar badan aad u jebiyo xeerarka nidaamka, marka hore deriskaada kala hadal arrinta. Haddii tani ay waxba caawin weyso, waxaad la xiriir kartaa odayga guriga ama laga kiresytaha. Nabadda guriga waxaa loola jeedaa sidoo kale in aad leedahay go’aanka cidda gurigaada imaan karta.

## Xuquuqda iyo waajibaadka kireystaha

Waxaa waajib kaa saaran yahay

- in aad kirada waqtigeeda ku bixiso. Caddadka kiradu waxuu ku qoran tahay heshiiska kirada. Laga kireystuhu wuxuu kirada guriga ku qaaliyeen karaa hab waafaqsan waxa lagu heshiiyay ee heshiiska kirada ku qoran.
- in aad ka taxadirto in xaaladda gurigu wanaagsanaato.
- in aad u hoggaansato shuruudaha heshiiska kirada. Haddii tusaale ahaan xeshiiska kirada lagu mamnuucayo in gudaha sigaar lagu cabo, markaas sigaar kuma cabi kartid gudaha gurigaada. Haddii heshiiska kirada lagu dalbanayo caymiska guriga, waa in aad markaas gashaa ceymiska. Si kastoo ay ahaatee waxaa wanaagsan in la galo ceymiska guriga, xittaa haddii aan lagaa dooneyn.
- in aad weydiisato ogolaansho haddii aad dooneyso in aad wax ka bedesho guriga, tusaale ahaan haddii aad derbi rinjiyeynayso. Ogolaanshiyo la'aan waxba kama bedeli kartid guriga, haddii aad xittaa adigu bixineyso kharashka dayactirka. Weydiiso ogolaansho qoraal ah.
- in aad u megto laga kireystaha, haddii aad guriga qasaare u geysatay.
- in aad ogeysiiso laga kireystaha, haddii aad guriga ku aragto cillado, uu laga kireystaha mas'uul ka yahay. Tusaale ahaan laga kireystuhu wuxuu mas'uul ka yahay qalabka guriga ku dhisan iyo qalabka dhulka.
- in aad ogeysiiso shirkadda dayactirka guriga cilladaha imaan kara sida tubo biyo deyneysa oo kale.

Waxaad xaq u leedahay

- in guriga aad kireysatay ku deganaato si waafaqsan heshiiska kirada. Laga kireystuhu wuxuu guriga ku imaan karaa oo kaliiya xaalado gaar ah marka ay dhacaan, tusaale ahaan isagoo ilaalinaya dayactir guriga ka socda ama isagoo soo tusaya qof guriga ka iibsaneysa. Markaas xittaa waa in uu adiga arrinta horay kaagala heshiiyaa.
- in aad horay u hesho ogeysiis qoraal ah, haddii ay kiradu kaceyso. Ogeysiiska waa in ay ku qoran tahay waqtiga ay kiradu kaceyso iyo inta ku kordheysa, iyo sababta loo cuskaday kicinta kirada. Si kastaba ha ahaatee haddii heshiiska kirada lagu qoray shuruudaha iyo wakhtiga kicinta ijaarka, laga kireystuhu wuxuu isagoo aan kuu soo dirin wargelin gaar ah kicin karaa kirada isagoo ku salaynaya heshiishka.
- waqtiga ka bixista heshiiska kirada ee uu sharcigu dhigayo.
- in aad islamarkiiba heshiiska kirada ka baxdo, haddii deganaanshaha gurigu ay halis ku tahay caafimaadka.
- in aad qeyb guriga ka mid ah qof kale ka kireysato, haddii aysan dhib ku aheyn laga kireystaha.
- in aad horay u hesho ogeysiiska dayactirka guriga. Dayactirka yar waa in lagu soo ogeysiyaa 14 maalmood ka hor kuwa weynna 6 bilood ka hor. Si kastoo ay ahaatee dayactirrada degdegga ah ogeysiis la'aan ayaa la sameyn karaa. Haddii ay adag tahay ama aysan suurtagal aheyn in guriga la deganaado inta dayactirku socdo, waxaad xaq u leedahay in aad ka baxdo heshiiska kirada ama aad hesho qiimo-dhimista kirada. Si kastoo ay ahaatee waa in aad arrintan mar walba kala heshiisaa laga kireystaha.

# Nabadgelyada guriga

## Nabadgelyada dabka

- Dab ka diiguhu wuxuu badbaadin karaa naftaada. Haddii gurigaaga uu dab qabsado. Dab kadiguhu wuxuu bixinayaa cod aad u dheer, markaas waxaad ka gaari karaysaa inaad guriga dibadda uga baxdo.
- Ka taxadar in gurigaagu uu leeyahay dab ka digeyaal badan oo ku filan (palovaroitin). Dab ka digeyaasha waxaa lagu gadaa dukaamada caadiga ah iyo kuwa qalabka dhismaha. Hal dab kadige wuxuu marwalba ku filan yahay ilaa 60 mitir oo iskuweer ah. Tusaale ahaan haddii ay baaxadda gurigaagu tahay 65 mitir oo iskuweer ah waxaad u baahanaysaa 2 dab kadige. Haddii uu gurigaagu yahay mid ka badan hal dabaq, markaas dabaq walba baaxaddiisa u xisaabi si gooni ah. Dabaq walba waa inuu leeyahay dab kadige u gooni ah.
- Si joogto ah u hubi inuu dab kadigu shaqaynayo. Bateriga ka badel haddii loo baahdo, sida wanaagsan sannadkiiba hal mar.
- Adigaa mas'uul ka ah dab kadigaha, xattaa haddii aad degan tahay guri kiro ah.
- Guryaha Finnishu waxay inta badan leeyihiin sauna. Xattaa haddii aadan isticmaaleyn saunada dhagxaanta kululeysa dushooda waligaa ha saarin wax alaab ah, haddii kale dab ayaa ka kici kara. Tusaale ahaan dhar ha ku qalajin dhagxaanta saunada dushooda ama agtooda. Isticmaalka kadib mar walba demi ama bakhtii saunada korontada ah.
- Markii aad guriga ka baxaysid, xasuuso inaad hubisid, in makiinadda cuntada lagu kariyo, dhagxaanta saunada iyo feerada dharkuba ay dansan yihiin.
- Waxaa wanaagsan in guriga uu yaalo bad damiye. Cimaaradaha dhaareed qaarkood marinkooda jaranjarada wuxuu leeyahay dab damiye (palosammutin). Sii ogow meesha uu yaalo dab damiyaha kuugu dhaw.
- Ka taxadar, in gurigaaga uu yaalo bustaha dabka lagu demiyo. Bustaha dabka lagu damiyo waxaa wanaagsan in aad ku xafido makiinadda cuntada lagu kariyo agteeda.
- Cunto ha uga tegin makiinada cuntada lagu kariyo oo kulul dusheeda iyadoo aan la dul joogin. Si gaar ah uga feejignoow haddii aad habeenkii cunto karineysid. Ha karin cunto haddii aad sarqaansantahay.
- Ha ku xafin wax alaab ah makiinadda cuntada lagu kariyo dusheeda. Carruurta, xayawaanaadka gurijoogta ah ama taabasho aan ula kac ahayn ayaa si aan ula kac ahayn u daari kara makiinadda cuntada. Markaas alaabada sallaxa makiinadda cuntada dusheeda saaran ayaa guban kara.

- Haddii uu duffanku gubto markii aad cuntada karineysid, ku bakhtii dabka daboolka digsiga ama daboolka birtaawada ama bustaha dabka lagu demiyo. Ha isticmaalin wax biyo ah.
- Xasuuso inaad demiso aaladaha korontada ah isticmaalka kadib. Sidoo kale makiinadda dharka lagu feereeyo waa inaad bareeska korontada ka saarto isticmaalka kadib.
- Ha isticmaalin aaladaha korontada ah oo aan sida wanaagsan u shaqeyneyn ama xarigooda korontadu uu cilladeysan yahay.
- Haddii aaladda korontada ah uu dab ka kaco, daminteeda ha u isticmaalin wax biyo ah. Ku demi tusaale ahaan aaladda dabdemiska ee xoorta leh.
- Haddii uu gurigaagu leeyahay qalab kul siin koronto ah ama kululeeyeyaal kale, dushoooda ha saarin wax dun, dhar ama wax kaleba ah.
- U bannee isbeys agagaarka telefishinka, mikrada, qaboojiyaha iyo freezerka. Ha daboolin aaladahaan aan soo sheegnay. Waxaa habboon haddii ay suurtogal tahay in sannadkiiba hal mar boorka tusaale ahaan huufarka la mariyo qaboojiyaha iyo freezer gadaashooda.
- Gudaha ha ku cabin sigaar.
- Ha ka tegin shumaca oo shidan ayadoo aan la fiirineyn. Shumaca oo shidan ha saarin daaha agtiisa, xattaa haddii aad adigu joogtid goobta.
- Haddii ii dab kaco, wac lambarka xaaladaha deg degga ah 112.

## Sidaan ayaad uga badbaadeysaa waxyeelada biyaha

- Markii aad guriga ka baxaysid, ha ka tegin qasaaladda dharka iyo mashinka maacunta lagu dhaqo oo shidan.
- Si joogto ah hubi ama koontarool, in tubooyinka gurigaagu aysan biyo daadeneyn iyo in makiinadaha gurigu aysan biyo dhulka ku daadineyn.
- Haddii aadan isticmaaleyn, mar walba ha xirnaadeen qasabadaha qasaaladda dharka iyo mashinka maacunta lagu dhaqo.
- Waa in qaboojiyaha, freezerka iyo mashinka maacunta hoostooda la dhigo bac godan oo weel ah oo biyaha ka celisa dhulka. Waxaa loo xiraa sida aaladahan loo xiro oo kale.
- Lama ogola inaad adigu xirtid mashinka maacuunta lagu dhaqo, balse waxaa sameeya qof xirfad u leh.
- Haddii gurigaaga ay waxyeelo biyo ka dhacdo, isku day inaad meesha biyuhu ka daadanayaan aad ka xirto rubuneetada tubada. Haddii aad degentahay guri dabaq ama saf ah, haddiiba ogeysii qubashada biyaha lambarka heeganka ee shirkadda ku shuqulka leh dayactirka guriga. Haddii aad degen tahay gurigaaga kuu goonida ah, ogeysii heeganka shirkadda qasabadaha biyaha.

# Qashinka iyo dib u isticmaalidda

Ku kala sooc qashinka guriga, ka hor inta aadan qashinka geyn goobta qashinqubka. Inta badan Finland waxaa qashinka loo kala soocaa warqad, kartoon, quraarad, bir, caaf, qashinka isku jira, qashinka halista ah, qalabka korontada iyo batariga. Marka si hagaagsan loo kala sooco alaabta qashinka la keenayo dib ayaa looga samayn karaa alaab cusub.

Dadka siyaabo kala duwan ayaa loogu hagaa qaabka ay u kala soocayaan qashinka yada oo ay ku xidhantahay qofku meesha uu ka daganyahay Finland. Caadiyaan macluumaadka ku saabsan qaabka ad u kala soocayso waxa ad ka heli kartaa xaafadaada meesha loogu talo galay in qashinka lagu tuuro. Waxad sidoo kale waydiin kartaa macluumaad dheeraad ah shirkadda ad guriga ka kiraysatay ama degmadaada. Haka tuurin qashinka daaqada hana ku tuurin qashin kaymaha ama dariiqyada.

Alaabta anan jabnayn ma aha qashin. Alaabta waxad gaysan kartaa suuqyada alaabta la soo isticmaalay oo ad ku gadan kartaa, waxad galin kartaa internetka si lagaaga gato ama waxad gayn kartaa xarumaha alaabta lagu wareejiyo. Finland waa caadi in uu qofku iibsado alaab la soo isticmaalay, si fudud baana loo helaa alaab fiican oo la soo isticmaalo.

## Sidee qashinka loo kala soocaa

Alaabta waxa lagu kala soocaa waxa ay ka samaysanyihiin.

Haku ridin bullaacadaha ama musqusha qashin, cunto ama kemikaalo dheeraad ah. Qashinka halista ah mar kasta gee meelaha qashinka lagu kala sooco ee loogu talo galay.

Dhismayaasha oo dhan markasta lama dhigin alaabta lagu tuuro qashinka la kala soocay. Qashinka meelaha lagu tuuro ee dhismayaasha ama guryaha kale ha gaynin qashinkaaga. Sidoo kale ha keenin qashinqubka gurigaaga qashin ad meel kale ka keentay sida ganacsigaaga.

# 2.5. Waxbarashada

## Nidaamka waxbarashada ee Finnishka

Waxbarashada Finland waa mid heerkeedu sareeyo. Farqiyada natoojinka waxbarasho ee u dhexeeya dugsiyada kala duwan waa kuwa yar, ku dhowaad dadka oo dhanna waxey dugsiga dhexe ku dhameeyay waqtiga loogu talagalay. Waxbarasho-horaadka, waxbarashada aasaasiga ah iyo waxbarashada heerka labaad waa lacag la'aan, xittaa markaas kaddib waxbarashadu inta badan waa lacag la'aan. Ujeedadu waa in dadka oo dhan ay fursad u helaan waxbarasho tayo leh oo aan ku xirneyn dakhliga qoyska iyo in in loo barbaaro sidii muwaadin firfircoon.

Nidaamka waxbarashada waxaa ku jira barbaarin-horaad, waxbarasho-horaad, waxbarashada heerka labaad, waxbarashada sare. Waxbarashada dadka waaweyn waxaa loogu talagalay dadka waaweyn waxaana ku jira fursado kala duduwan oo ka billowga tan aasaasiga ah illaa iyio atcliinta sare.

### Barbaarin-horaadka

Finland carruurtu waxay xaq u leeyihiin barbaarin-horaad ka hor inta aanay gaarin da'da dugsiga. Barbaarin-horaadka waxaa lagu qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedyada iyo xannaano-maalmeedka qoyska. Waxaa kale oo uu cunuggu waalidkiis tusaale ahaan kala qaybqaadan karaa barbaarin-horaadka furan jardiinada ciyaarta. Hadafku waa in la taageero horumarka iyo nolol wanaagga cunugga iyo in sare loo qaado siinnaan waxbarashada. Cunuggu wuxuu barbaarin-horaadka ku baranayaa waxyaabaha ay kamidka yihiin aqoonta bulshada iyo luqadda, aqqoonta gacanta iyo macluumaadyo kala duwan. Waxaa kale oo uu cunuggu baranayaa aqoonta ka caawinaysa in uu wax sii barto.

Finland degmooyinka ayaa barbaarin-horaadka qabanqaabiya. Waxaa lagu maalgeliyaa lacagta canshuurta, waana sababta ay qiimo ahaan qoysaska ugu jaban yihiin. Waxaa kale oo Finland ka jira barbaarin-horaadyo gaar loo leeyahay. Carruurta waxaa la shaqaynaya macallimiinta barbaarin-horaadka ee la tababaray, sooshal iyo carruur-hayeyaal.

### Waxbarasho-horaadka

Finland cunuggu waa in uu ka qaybqaataa waxbarasho-horaadka hal sano ka hor inta aanu waajibka waxbarashadu billaaban. Inta badan waxbarasho-horaadku waxay billaabataa sannadka uu cunuggu lix sano buuxiyo. Waxbarasho-horaadka waxaa qabanqaabiya degmooyinka qoyskana waa u lacag la'aan.

Waxaa bixiya macallimiinta barbaarin-horaadka, kuwaas oo tacliin sare leh. Inta badan waxbarasho-horaadka waxaa la qaataa Isniinta illaa iyo Jimcaha afar saacadood maalinti inta lagu jiro wakhtiyada shaqada dugsiyada. Ka sokow waxbarasho-horaadka, cunuggu wuxuu sidoo kale ka qaybqaadan karaa barbaarin-horaadka.

## Waxbarashada aasaasiga ah

Finland waxbarashada aasaasiga ah waxay billaabataa sannadka uu cunuggu todobo sano buuxiyo. Dhammaan carruurta sida rasmiga ah Finland u deggan waa in ay ka qaybgalaan waxbarashada aasaasiga ah. Dugsiga hoose-dhexe waa sagaal fasal-dugsiyeed.

Waxbarashada aasaasiga waxaa qabanqaabiya degmooyinka qoysaska waa u lacag la'aan. Waxbarashada fasalka koowaad iyo labaad waa ugu yaraan 20 saacadood oo waxbarasho ah todobaadki, tiradaasna waa ay sii kordhinaysaa marka la gaaro fasallada sare.

Haddii cunugga ama da'yarku uu dhowaan u soo guuray Finland, wuxuu heli karaa waxbarashada loogu diyaarinayo waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashada diyaarinta ah waxey inta badan qaadataa hal sano. Taas kaddibna wuxuu ardaygu sidii luqad labaad u sii baran karaan Finnishka ama Iswidhishka, ama luqad S2 ah, haddii asaga ama ayada uu baahan yihiin in barashada luqada lagu kaalmeeyo.

Muhaajiriinta qaangaarka ah ee aan dalkoodi ka soo qaadan shahaadada dugsiga dhexe waxey dugsiga sare ee dadka waaweyn ku baran karaan dugsiga.

## Waxbarashada heerka labaad

Waxyaabaha la kala dooran karo waxbarashada asaasiga ah kaddib waa dugsi sare iyo waxbarasho xirfadeed. Waa waxbarashada heerka labaad. Waxbarashada heerka labaad ardayda waa u lacag la'aan.

### Dugsiga sare

Dugsiga sare waa waxbatasho aqoon guud ah, mana ahan mid laga baranayo wax xirfad ah. Inta badan dugsiyada sare waxaa lagu bartaa maaddooyin la mid ah kuwa waxbarashada aasaasiga ah, laakiin waxbarashada ayaa ka adag kana ikhtiyaar badan. Ugu dambayn ardaydu waxay inta badan qaataan shahaadada ardayga sare. Dugsiga sare wuxuu qaataa 2-4 sano, ardayga ayeeyna ku xiran tahay. Markaas kaddib ayaa la iskudayi karaa gelitaanka jaamacadda, dugsiga xirfadda ee tacliinta sare ama waxbarashada xirfadda ee dugsiga sare ku salaysan.

### Waxbarasho xirfadeed

Waxbarashada xirfaddu waa mid ka waxqabad ahaan ka badan tan dugsiga sare. Halkaas waxaa lagu baran karaa qiyaastii saddex sano waxbarashada xirfadda aasaasiga ah. Inta mihnadda shaqada lagu jiro ayaa waxaa la samayn karaa xirfad ama xirfadda gaarka ah. Waxyaabaha muhiimka ah ee ku jira waxbarashada xirfaddu waa wax ku barashada nolosha shaqada. Haddii aad doonayso waxaad waxbarashada xirfadda ka sii wadan kartaa illaa iyo waxbarashada dugsiga tacliinta sare.

## Waxbarashada sare

Waxbarashada heerka labaad kaddib waxaa la sii wadan karaa waxbarashada dugsiga tacliinta sare. Finland waxaa waxbarashada dugsiga tacliinta sare ka bixiya dugsiyada tacliinta sare ee xirfadda iyo jaamacadaha. Dugsiyada tacliinta sare iyo machadyadu iyaga ayaa go'aansada xulashada ama qaadashada ardayga.

Dugsiga tacliinta sare waxey waxbarashadiisu ardayga u noqon kartaa lacag la'aan ama lacag. Lacag sanad-dugsiyeedka waa in la bixiyaa, haddii aan la aheyn Muwaadin Midowga Yurub ama wadamada ETA ama xubin ka tirsan qoysaska muwaadiniintaas islamarkaasna aad qaadaneyso waxbarashada shahaadada kowaad ama labaad ee jaamacadda oo afka Ingiriiska ku baxaya.

## Fursadaha kale ee waxbarasho

Waxaa kale oo Finland ka jira machadyo badan oo bixiya waxbarashooyin loogu talaggalay dadka oo dhan da'kasta oo jireen, kuwaas oo aan darajo aqooneed lagu qaadan. Inta badan waxbarashooyinkan waxaa loogu talaggalay dadka waaweyn. Machadyada noocaan ah ee hawlaha aqoonta guud ee xorta ah waa machadyada aqoon-kororsiga dadka waaweyn, kulleejooyinka aqoon-kororsiga, jaamacadaha xagaaga, xarumaha waxbarashada iyo xarumaha waxbarashada jimicsiga.

Waxbarashooyinka waa aqoon guud. Waxaad baran kartaa tusaale ahaan luqado, maadooyin farshaxaneed, shaqo gacmeedyo iyo isgaarsiinta. Waxbarashadu inta badan lacag yar ayeey u tahay ardayga.

Xaaldaha qaarkood marka lagu jiro waxbarashada machadyadu waxey noqon kartaa lacag la'aan. Tusaale ahaan haddii waxbarashada wax qoris akhrinta ah ama waxbarasho luqadeed kale lagu daray qorshahaada la qabsashada, wax lacag ah lagaama qaadayo.

# 2.6. Caafimaadka

## Adeega caafimaadka ee Finland

Finland waxaa ka jira adeegyada caafimaadka dadweynaha oo raqiis ah oo loogu talaggalay dhammaan dadka dalka si rasmi ah u deggan. Waxaa intaas dheera in shaqo-bixiyayaashu ay shaqaalahooda siiyaan adeegga caafimaadka shaqaalaha. waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay.

Waxaad isticmaali kartaa adeegyada guud ee caafimaadka dalka Finland, haddii aad degmo Finland ka mid ah ay degaan kuu tahay (kotikunta). Xuquuqda helitaanka degenaanshadu waxay ku xirantahay arimahaan soo socda:

- Wadanka aad Finland uga soo guurtay
- Waxa ay tahay sababta aad Finland u timid (tusaale. shaqo, waxbarasho)
- si rasmi ah miyaad Finland ugu soo guureysaa mise waxaad Finland u degentahay si kumeel gaar ah
- Haddii aad Finland si ku meelgaar ah u degen tahay, intee in le'eg ayaad Finland joogtay

Haddii aadan hubin, in aad guri degmo ku leedahay Finland, ka hubso xaaladdaada Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka (Digi- ja väestötietovirasto).

Marka aad xaalad degdeg ah ku jirto waxaad daryeel ka heleysaa daryeelka caafimaadka dadweynaha haddii aadan xittaa guri-degmo ku laheyn Finland ama aadan shaqo darteed xaq u laheyn daryeel. Kharashka daryeelka dib ayaa lagaaga gudan karaa.

Haddii aadan xaq u lahayn adeegyada guud ee caafimaadka, waxaad waqti ka qabsan kartaa rugta dhakhaatiirta ee gaarka loo leeyahay. Adeegyada caafimaadka gaarka loo leeyahay macaamiisha aad ayey uga qaalisan yihiin adeegayada guud ee caafimaadka ee dawladu bixiso.

### Adeegyada caafimaadka ee dawlada

Adeegyada caafimaadka ee guud waa tusaale ahaan rugaha caafimaadka, bolikiliinikooyinka iyo isbitaallada. Markii aad xanuunsato marka horey la xiriir rugtaada caafimaadka. Rugtaada caafimaadka waxaad ballan ka samaysan kartaa dhakhtarka guud ama kalkaalisada/kalkaaliyaha caafimaadka.

Inta badan rugaha caafimaadku waa xiran yihiin habeennadi iyo dhammaadka todobaadyada. Xanuunada degdegga ah waxaa markaas lagu dabiibaa heeganka. Heeganka waxaa loogu talaggalay xaaladaha u baahan in degdeg ah wax looga qabto. Haddii ay aanay jirradaadu u baahnayn daryeel degdeg ah, waxaad ballan ka qabsan kartaa rugtaada caafimaadka marka xiga ee ay furantahay.

## Adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay

Macluumaadyada xiriirka rugaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay waxaad ka heli kartaa tusaale ahaan internetka. Waxaa dhici karta inaad waqti uga heli karto rugta caafimaadka ee gaarka loo leeyahay si ka dhaqso badan adeegyada caafimaadka ee dadweynaha. Adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay si muuqata ayeey ugu qaalisan yihiin kuwa dadweynaha. Rugaha dhaqaatiirta ee kala duduwan waxey bixiyaan adeegyo kala gedisan. Adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay waxaa isticmaali kara dadka oo dhan, xitaa kuwa aan guri degmo ku laheyn Finland.

## Daryeelka caafimaadka ee muwaadinka waqooyiga Yurub

Haddii wadan kale oo Wuqooyiga Yurub ah aad ku leedahay ceymiska jirada, waxaad xaq u leedahay Finland gudaheeda in aad hesho daryeelka jirada ee aan laga maarmin. Waxaad daryeelka u heleysaa islamarkaasna adeegga uga bixineysaa si lamid ah sida ay Finnishku u bixiyaan una helaan adeegga. Horay u sii qaado aqoonsigaada marka aad isticmaaleyso adeegyada caafimaadka.

## Daryeelka caafimaadka muwaadinka Midowga Yurub

Haddii aad wadan kale oo Midowgya Yurub, ETA ah Switzerland, Ingiriiska ama Woqooyiga Ireland ku leedahay caymiska jirada, waxaad Finland gudaheeda xaq u leedahay in aad hesho daryeelka jirada ee aan laga maarmin. Si aad u heli karto daryeelkaas, waa inaad ka heysataa kaarka daryeelka jirada Yurub. Waa in aad kaarka daryeelka jirrada ka soo qaadataa wadanka aad caymiska caafimaadka uga jirto.

Kaarka daryeelka jirada ee Yurub wuxuu xaq kuu siinayaa daryeel haddii aad jirato ama aad shil gasho. Daryeel waad heli kartaa xitaa haddii jiro aad mudo dheer qabtay darteed aad u baahantahay daryeel. Kaarka waxaa kale oo aad ku heleysaa daryeelka la xiriira uurka iyo dhalmada. Daryeelka waxaad ku heleysaa qiimo lamid ah dadka sida joogtada ah u deggan Finland.

### Daryeelka caafimaadka shaqaalaha iyo ganacsadaha

Haddii aad Finland shaqo u timid, waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay isticmaalka adeegyada caafimaadka dadweynaha. Tani waxay ku xiran tahay dhririrka inta heshiiska shaqadaadu uu socday iyo nooca heshiiska shaqada iyo weliba wadanka aad Finland uga timid.

### Daryeelka caafimaadka ardayda

Haddii aad Finland ardaynimo ku imaaneysid adigoo ka imaanaya wadan kale oo Waqooyiga Yurub, waxaad xaq u leedahay in aad hesho daryeelka bukaanka ee Finland. Daryeelka waxaad ku heleysaa shuruudo la mid ah kuwa ay Finnishku ku helaan adeeggana waxaadna sidoo kale ka bixinaysa lacag la mid ah tan ay bixiyaan. Horay u sii qaado aqoonsigaada rasmiga ah, marka aad isticmaalayso adeegyada caafimaadka.

Haddii aad Finland u timaado waxabarasho adigoo ka imaanaya waddan Midowga Yurub ah, waddan ETA ah, Ingiriiska ama Iswitzerland, ka soo qaado dalkaada kaarka daryeelka bukaanka ee reer Yurub ka hor inta aadan Finland imaan. Waxaad xaq u leedahay marka aad Finland joogto daryeelka jirrada ee caafimaad ahaan aadan ka maarmin, haddii aad haysato kaarka bukaanka ee reer Yurub.

Haddii aad Finland u timaado waxabarasho adigoo ka imaanaya waddan kale, waxaad inta badan waddankaada uga baahan tahay caymiska bukaanka oo buuxa ka hor inta aadan Finland ka inta aan lagu siin sharciga deganaanshaha Finland. Haddii waxbarashadaadu inta ay soconayso lagu qiyaaso ugu yaraan labo sano, sida badan Finland waxaad ka heleysaa magaalo degaan kuu noqota waxaadna u gudbeysaa xayndaabka adeegayda caafimaadka ee ay degmadu bixiso. Markaas waxaa kugu filan, in caymiskaagu uu ugu horeyn daboolo kharashka dawooyinka. Haddii aadan hubin, inaad magaalo degaan aad Finland xaq ugu leedahay arrinta ka soo hubi Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka (Digi- ja väestötietovirasto).

## Caafimaadka ilmaha

Finland waxaa ka jira adeeg caafimaad oo ballaaran islamarkaasna tayo leh oo loogu talaggalay carruurta. Adeegyada caafimaadka dadweynuhu waa raqiis ama waa lacag la'aan, tusaale ahaan rugaha daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka dugsiga. Waxaa kale oo intaas dheer oo la helaa adeegyo caafimaad oo gaar loo leeyahay oo fara badan.

Haddii cunuggaadu uu guri degmo ku leeyahay Finland, wuxuu xaq u leeyahay in uu isticmaalo adeegyada caafimaadka ee dadweynaha. Mararka qaar cunuggu wuxuu xaq u leeyahay in uu adeegyada isticmaalo isagoo aan xittaa lahayn guri degmo. Tusaale ahaan dadka ka yar 18 sano ee magangelyo-doonka ah wuxuu xaq u leeyahay adeegyada.

## Markii uu ilmuhu xanuunsado

Ilmaha xummadeysan ama sidoodaba xanuunsan lama geyn karo goobaha lagu xanaaneeyo. Haddii ilmo da'diisu ay ka yar tahay 10 sano uu si lama filaan ah u xanuunsado, hooyada ama aabuhu guriga ayey ilmaha la joogi karaan si ay u xannaaneeyaan. Fasaxa daryeelka carruurtu wuxuu ugu badnaan socon karaa afar maalmood. Heshiiska shuruudaha shaqada ayaa looga heshiiiyey in waqtigaas mushaar la helayo iyo inkale.

## Caafimaadka carruuraha yar yar

Carruurta aan weli da'da iskuulka gaarin waxaa caafimaadkooda inta badanka taxadaraya rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka. Cunuggu wuxuu inta badan dugsiga billaabaa sannadka uu 7 sano buuxiyo. Rugta daryeelka dhallaanka iyo hooyadu waxay caawinaysaa koritaanka iyo horumarka carruurta ee xagga jirka, maskaxda iyo bulshanimada. Carruurtu waxay xarunta hooyada iyo dhallaanka si joogto ag ugula kulmaan dhakhtarka iyo kalkaalisada caafimaadka.

## Caadimaadka ilmaha iskuulka gaarey ama iskuuleyda ah

Iskuul walba waxaa loo magacaabay dhakhtar iyo kalkaaliye/kalkaaliso caafimaad. Kalkaalisadu caafimaadka ilmaha ayey iskuulka dhexdiisa ku jeeg gareynaysaa. Kaalkaalisada caafimaadku iskuulka waxay joogtaa usbuuciiba maalmo cayiman. Ardaydu ayaga ayaa u tegi kara kalkaalisada caafimaadaka, haddii ay dhibaato haysato. Macluumaadka la xiriira daryeelka caafimaadka ee iskuulka waxaad ka heleysaa bogga internetka ee wasaarada caaafimaadka iyo arimaha bulshada (Sosiaali- ja terveysministeriö).

## Talaalka

Dalka Finland ilmaha waxaa la siiyaa fursad looga talaalo (rokotus) cuduro badan oo la is-qabadsiiyo. Carruurta waxaa lagu talaalaa xarunta hooyada iyo dhalaanka (lastenneuvola) iyo rugta daryeelka caafimaad ee iskuulka. Talaalada ka midka ah, barnaamijka talaalka qoyska waxay u yihiin bilaash. Talaalku qasab ma ahan. Dalka Finland carruurta intooda badan waxay qaataan talaalada ka midka ah barnaamijka talaalka. U sheeg kalkaalisada caafimaadka talaalada uu cunugaadu qaatay kahor imaanshiyaha Finland.

### Gudniinka wiilasha

Gudniinku (Ympärileikkaus) waa wax marka la sameeyo anan dib loola noqon karin. Haddii loo sameeyo sabab anan caafimaad ahayn waa qaliin lagu faragalinayo wiilka jidhkiisa iyo xaqqa uu u leeyahay in uu lamataabtaan ahaado. Gudniinka waxa fulin kara oo kaliyaata dhakhtar sharciyaysan. Si gudniinka loo fuliyo waa in la haystaa oggolaanshaha waalidka oo qoran. Haddii ilmahu uu leeyahay labo waalid waa in la helaa labada waalidba oggolaanshohooda oo qoran. Haddii la waayo lama gudi karo wiilka. Wiilku waxa uu xaq u leeyahay in uu diido gudniinka.

### Gudniinka qodban ee gabdhaha

Gudniinka qodban ee gabdhaha lagu sameeyo dembi ayuu ka yaha Finland. Waxaa laga heli karaa ciqaab xabsiyeed sannado badan ah. Waxaa sidoo kale ah dembi in dalka dibaddiisa gabdhaha lagu soo sameeyo gudbiinka qodban.

Gudniinka qodban ee xubnaha taranku wuxuu sababaa dhibaatooyin caafimaadka oo daran islamarkaasna noocyo badan wuxuuna sidoo kale inta badan halis ku yahay caafimaadka xittaa marka la qaangaaro. Qodbiddu waxay sidoo kale cunugga gelisaa cabsi waana waayo-aragnimo argagax leh.

## Dareelka ilkaha

### Daryeelka ilkaha dadweynaha

Maarkii aad rabtid inaad waqti ka qabsato rugta daryeelka ilkaha, wac waqti qabsashada xarunta ilkaha ee degmadaada. Sida badan teleefoonka ayaa lagu qiimeeyaa baahida loo qabo daryeelka iyo sida ay degdegga u tahay. Haddii baahida daryeelku aanay degdeg ahayn waxaa laga yaabaa inaad sugto dhawr bilood. Daryeelka waa inaad heshaa lix bilood gudahood.

Galbihii iyo sabtiga iyo axada heeganka waxaa la igugu geeyaa isbitaalada waaweyn. Haddii aad degentahay magaalo yar, waxaa laga yaabaa inaad ku qasbanaato inaad u soo safarto heeganka maalooyinka waaweyn ee kuu dhaw.

### Daryeelka ilkaha ee gaarka loo leeyhay

Daryeelka ilkaha ee gaarka loo leeyahay wuu ka qaalisanyahay daryeelka ilkaha ee degmaha ama daryeelka guud. Haddii aad ku jirto xeyndaabka Ammaanka bulshada Finland, Kelada ayaa qeyb ka bixineysa kharashka. Si kastoo ay ahaataba Keladu ma magdhabeyso tusaale ahaan daryeelka quseeya muuqaalka bannaanka. Bogagga shabakadda Kelada ayaa ka heleysaa macmuulaad dheeraad ah.

### Carruurta

Degmada ayaa carruurtu si joogto ah ugu qabanqaabisa koontaroolka ilkaha. Carruurta kayar da'da dugsiga waxaa labadii sanaba mar lagu sameeyaa koontaroolka ilkaha. Magaalooyinka qaarkood waxaa cunuggu gurigiisa loogu diraa warqad loogu yeerayo koontaroolka ilkaha. Haddii wakhtigu uusan kugu habbooneyn, wac qabsashada ballanta oo wakhtiga beddelo. Magaalooyinka qaarkood waa in aad adigu ballanta ka qabsataa.

## Caafimaadka dhimirka

Qofkasta ayaa cawinaadda u baahan kara marka ay xaalado nololeed oo qalafsan la soo darsaan. Kaligaa ha isku koobin dhibaatooyinka ku haysta. Finland waxaa caawimaad ka bixiya tusaale ahaan rugaha caafimaadka iyo bolikiliinikooyinka caafimaadka dhimirka iyo teraabiistayaasha iyo dhakhaatiirta gaarka ah.

Xaaladaha nololeed ee adag waxay mararka qaar noqon karaan tusaale ahaan waddan laga guuro oo mid kale loo guuro, dhibaatooyinka goobta shaqada ama weynta shaqada. Dhibaatooyinka qoyska, furriinka, dhimashada ehelka, jirro ama isbeddel nololeed kale ayaa noqon kara xasarado dartood caawimaad looga baahan yahay. Xittaa arrin wanaagsan, tusaale ahaan dhalashada cunugga ayaa nolosha aad u beddeli karta, taas oo keeneysa in xaaladda darteed taageero loo baahdo. Mararka qaar waxaa si lama filaan ah kuugu soo boodi kara dareen xun, ka dib marka uu wakhti ka soo wareego waay-aragnimadii adkayd isla markaasna ay noloshu degto.

### Xagee cawinaada laga heli karaa?

Inta badan waxaa dhibkan kaa caawinaya, in arrimaha laga hadlo qoyska ama asxaabta. Waxaa mararka qaar loo baahan yahay caawimaadda xirfadlayaasha. Kalkaalisada caafimaadka ama dhakhtarka ayaad wadajir uga fekeri kartaa, caawimaadda adiga ku habboon nooceeda.

Inta badan caawimaad waxaa laga helaa teraabiyada, daawooyinka ama labadooda oo wadajira. Mararka qaar waxaa loo baahan yahay daryeelka isbitaalka.

Haddii aad leedahay Guri degmo ee gudaha Finland, la xiriir rugtaada caafimaadka. Haddii aad u baahan tahay caawimaad degdeg ah, ugu sheeg telefoonka markii aad wacaysid. Haddii loo baahdo dhakhtarka ayaa kuu qoraya warqad uu kuugu dirayo bolikiliinikada cudurada dhimirka ama isbitaal kale oo qaabilsan cudurada dhimirka. Bolikiliinikada si toos ah uma aadi kartid adigoon wadan warqad uu dhakhar kuugu qoray inaad u tagto.

Dhakhtartka ama cilmu-nafsiyaqaanka waxaad arrimahaaga ugula hadli kartaa si aaminaad iyo kalsooni leh amaba sir ah. Waxaa iyaga waajib ku ah xafididda sirta. Taas waxaa loola jeedaa, in aanay arrimahaada u sheegi karo hawlwadeennada kale. Haddii macluumaadkaaga ay u baahado waax kale oo xagga daryeelka caafimaadka ah, siinta macluumaadka adiga ayaa si gooni ah ruqsad laguugu weydiinayaa.

Rugtaada caafimaadka waxaad ka heleysaa macluumaad sugan oo la xiriira, sida degmadaada looga heli karo adeegyada daryeelka cudurada dhimirka.

## Dawooyinka

Finland waxaa daawooyinka laga iibsan karaa farmashiyayaasha. Daawooyinka la isku daryeelo sida daawooyinka xanuunka waa la iibsan karaa iyagoo aanu dhakhtar qorin. Si kastaba ha ahaatee daawooyin badan ayaa u baahan in dhakhtar kuu qoro rijeeto ka hor inta aadan soo iibsan. Tusaale ahaan daawooyinka antibiyootiga ah waa kuwa uu dhakhtar qoro.

Haddii aad ku jirto xayndaabka caymiska jirrada ee Finnishka Kelada ayaa bixinaya qayb kamida qiimada daawada. Keladu wax magdhaw ah kama bixinayso dawooyinka aad warqad la'aanta ku iibsaneyso. Magdhowga waxad heli kartaa ka dib markaa ay kuu buuxsanto inta hore ee qofku isagu ka mas’uulka yahay, intaasi waxay buuxsamaysaa marka aad dawooyinka la magdhabayo aad ku isticmaasho 50 yuuro sannadkii. Qaybta qofku ka mas’uul yahay inuu iska bixiyo ee hore ma khusayso carruurta. Waxaa nidaamka laguu isticmaalayaa billowga sannadka aad 19 sano buuxisay.

# 2.7. Qoyska

## Finland markii uu ilmuhu dhaso

Marka uu cunug qoys ugu dhasho Finland, waa in isbitaalka looga diiwaangeliyaa nidaamka macluumaadka dadka. Waalidku waa in ay magaca cunugga iyo afkiisa hooyo ku wargeliyaan Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Jinsiyadda uu cunuggu helay waxay ku xiran tahay jinsiyadda waalidka.

### Luuqadda hooyada ee ilamaha

Marka uu cunuggu dhasho waa in loo diiwaangeliyaa afkiisa hooyo. Hal luqad oo kaliya ayaad nidamaka macluumaadka dadka uga dooran kartaa in ay tahay afkiisa hooyo. Haddii aad dooneyso waxaad gadaal dambe ka beddeli kartaa luuqadda.

Haddii afka hooyo ee cunuggaadu uu yahay wax ka duwan Finnishka ama Iswidhishka wuxuu Finnishka ama Iswidhishka u baranayaan sidii luqada labaad oo kale, waxbarashada S2. Waxaad taas dheer in cunuggaadu uu baran karo luqadda ugu qoran in ay tahay afkiisa hooyo. Barashada afka hooyo ee dugsigu waa mid aan khasab aheyn.

## Dheelitirka nolosha qoyska iyo shaqada

Isku habbooneynsiinta nolosha qoyska iyo shaqadu waa kuwo Finland ku fudud marka loo barbardhigo wadamo badan oo kale. Shaqo-bixiyayaashu waxay u hoggaansamaan sharciyada wakhtiga shaqada iyo fasaxyada sannadka. Sababtaas ayaa ka dhigaysa wakhtiga shaqada mid aan xaddidnayn oo caqligal ah. Tani waxay ku siinaysaa fursado badan oo aad qoyskaada wakhti kula qaadato.

Qoyska badan oo Finland jooga ayeey labadooda waalid shaqeeyaan. Haddii uu qoyskaadu leedahay carruur yaryar, waxaad inta badan fursad u heleysaa in aad hesho firaaqo aad iyaga ku xannaaneyso. Waxaa kale oo intaas dheer in barbaarin-horaadyada guud iyo kuwa gaarka ahba ay yihiin kuwo heer sare ah islamarkaasna raqiis ah. Kelada ayaad kaalmo dhaqaale ka codsan kartaa haddii cunugga guriga ku hayso ama aad cunugga u qorto shaqaale haaya.

Finland, inta badan dumarku waa shaqeeyaan, haddii xittaa ay carruur yaryar heystaan. Haddii aad haween tahay ninkaada ama waalidka ugama baahnin in ay kuu oggolaadaan aadista shaqada ama waxbarashada.

# 2.8. Xaaladaha dhibka

## Dhibaatooyinka dhaqaale

### Haddii aadan bixin karin biilkaada

Haddii aad heysato biil aadan awoodin in aad bixiso, horay kala xiriir soo diraha biilka. Inta badan biilka waxaad u heleysaa wakhti dheeraad ah oo aad ku bixiso. Markaas waxaa biilka lagu daraa inta badan dulsaarka soo daahista.

### Haddii aadan awoodin inaad kirada gurigaada bixiso

Haddii aadan bixin kirada gurigaada, kaa kireeyaha gurigu wuxuu xaq u leeyahay in uu heshiiska ka baxo. Kireeyaha gurigu waa in uu ogeysiiyaa kan guriga laga kireeyay ka bixista heshiiska. Marxaladdan marka lagu jiro waxaa weli suurtagal ah in sida caadiga ah in lagala heshiiyo guri kireeyaha bixinta lacagta kirada. Haddii aadan bixin kiradaada, guri kireeyuhu wuxuu maxkamadda ka codsan karaa go'aanka guri ka saarista. Waxaa loola jeedaa inay waajib kugu tahay inaad guriga ka guurto iyo inaad bixiso kirooyinka aadan horay u bixin.

### Caawimaadda dhibaatooyinka dhaqaale

Hubi in aad codsatay dhammaan manfacyada bulshada ee aad helitaankooda xaq u leedahay. Manfacyadaan waxey noqon karaan tusaale ahaan ammaanka shaqo la'aanta, taageerada ijaarka, taageerada waxbarashada iyo taageerooyinka dhaqaale ee loogu talagalay qoysaska carruurta leh.

Haddii uu dakhligaada ama kan qoyskaadu aanu ku filnayn kharashaadka maalinlaha ah ee aan laga maarmin, waxaad Kelada ka codsan kartaa lacagta kaalmada nolosha ee aasaasiga ah. Kharashaadka maalinlaha ah ee aan laga maarmin waxaa loola jeedaa tusaale ahaan kharashaadka macquulka ah ee ku baxa cuntada, dharka, daryeelka caafimaadka iyo deegaanka. Waad codsan kartaa caawimaadda, haddii aad joogto u deggan tahay Finland.

Kahor inta aadan dalban lacagta kaalmada nolosha, dalbo caawinaadahaan kale, ee aad xaq u leedahay (tusaale ahaan lacagta badbaadada shaqola'aanta, lacagta kaalmada kirada, lacagta hawlgabka, lacagta kaalmada waxbarashada, lacag maalmeedka waalidnimada, lacag maalmeedka jirada, lacagta guri ku daryeelka ama lacagta quudinta carruurta ee waalidka laga qaado).

Haddii aad dhib ku qabto bixinta biilasha iyo deymaha, la xiriir talobixinta dhaqaalaha iyo deynta ee xafiiska caawimaadda arrimaha sharciga. Talobixinta dhaqaalaha iyo deynta ee xafiisyada caawimaadda arrimaha sharciga waa lacag la'aan waxaanna qabanqaabiya dowladda.

# Takooridda iyo midab-takoorka

## Waa maxay takoor?

Takooristu waxaa looga jeedaa kala darejeyn tixgelin, taasoo qofna lagu xumeeyo qofna lagu wanaajiyo arrin isku mid ah. Takoorkistu way ahaan kartaa tusaale mid lagu takooro qofka asalkiisa, jinsiyadiisa iyo diintiisa.

Takooristu waxay ahaan kartaa tusaale in, haddii aad ku weyso adeeg asalkaaga dartiis ama lagu xujeeyo warysiga dalbashada shaqo inaad u taqaaano afka finnishka si buuxd , iyadoon aheyn qabashada shaqada iney u baahan tahay aqoon luuqada ah.

Qodobka sinnaanta ayaa diidaya ku takoorista da'da, asalka, jinsiyada, luuqada, diinta, cibaadadda, fikirka, howlaha siyaasinimo, howlaha ururka shaqaalaha, aalada qoyska, xaalad caafimaad, naafonimada, lagaroonimada ama waxyaalo kale oo shaqsi la xiriira. Qofna ma aha in laga dhigo inuu qof kale ka liito arrimahaas dartood.

## Cunsuriyadda iyo dembiyada kale ee cadaawadda

Dembiga cadaawaddu waa dembi, kaas oo ay sababtiisu tahay iska sii necbaansho ama cadaawadnimo ku wajahan sifo gaar ah oo dhibanuhu leeyahay darteed. Sifooyinkan waxay noqon karaa asalka uu qofku ka soo jeedo, diinta, cibaadada, jihaysiga jinsiyeed, aqoonsiga jinsiyeed, muujinta jinsiga, dhaawac ama sifo u dhigma. Dembiga cadaawadda waxaa loo geysan karaa qof, koox, hanti, urur ama wakiladooda. Dembiga cadaawaddu wuxuu noqon karaa tusaale ahaan xoog-sheegasho, ku xadgudub sharafeed, takoorid, hanjabaad, dhibitaan ama waxyeelleyn. Haddii laguu geysto dhib cunsuriyad ah wargeli arrinka booliiska.

## Caawimaad loogu talagalay dhibanayaasha takoorka

Haddii aad dareemeyso goobta shaqada takooris, la xariir marka hore maddaxa shaqadaada. Haddii aadan caawimo ka helin, la xiriiir markaa xaquuq dhowraha shaqadaada (työsuojeluvaltuutettu) ama dandhowraha shaqaalaha (luottamusmies). Haddii arrinkii ku xalismi waayo goobtii shaqada la xiriir nawaaxigaaga badbaadadda shaqaalaha työsuojelupiiriin ama urrrurka shaqaalaha aad xubinta ka tahay.

Haddii aad ka shakiso in lagu takooray, waxaad la xiriir kartaa talobixinta ka dhanka ah takoorista ee Heeganka dhibanaha dembiga. Talobixinta ka dhanka takoorku waxey ku shaqeysaa telefoonka. Macluumaadyada xiriirka ee talobixinta waxaad ka heleysaa bogagga shabakadda ee Heeganka dhibanaha dembiga.

### Wakiiladda sinnaanta u dooda

Haddii aad kala kulanto takooris meelo kale oon aheyn goobta shaqada ama aad dareento takooris, waxaad la xiriirtaa u doodayaasha sinnaanta (yhdenvertaisuusvaltuutettu). Waad ula xiriiri kartaa xitaa dad kale ama horin kale adigoo matalaya.

# Dembiyada

## Haddii aad noqoto dhibbane dembi

### Wargelinta dembiga

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu booliska ku wargeliyo dembiga dhacay, yacni wargelinta dembiga. Booliska waxaad ku wargelin kartaa dembiga dhacay meel kasta oo aad joogtaba, mana ku xirna meesha uu dembigu ka dhacay. Wargelinta dembiga waxaad samayn kartaa:

- adigoo tegaya qaybta booliska xilliyada ay furan tahay ama
- adigoo isticmaalaya bogagga elegtroonigga ah ee booliska.

### Heeganka dhibbanaha dembiga

Haddii aad tahay dhibbane dembi waxaad taageero iyo talobixin ka heli kartaa Heeganka dhibbanaha dembiga. Heeganka dhibbanaha dembiga waxaad kula xiriiri kartaa telefoonka, chatinka ama waxaad imaan kartaa goobta adeegga. Heeganka dhibbanaha dembigu wuxuu sidoo kale bixiyaa talobixin sharciyeed lacag la’aan ah.

# Dagaalka

## Waa maxey dagaalku?

Dagaalku wuxuu noqon karaa tusaale ahaan

- cabsigelin, daba-socosho, ilaalinta
- liidis iyo qasbi
- garaacid, laadis iyo kala tuurid
- rabshad galmeed

Finland dagaalku waa dembi. Dagaalka ka dhanka ah xubnaha qoysku xittaa waa dembi. Ciqaabista jireed ee carruurta loo geysto, sida garaacidu waa dembi. Edbinta jireed waa mid uu cunuggu ka cabsado. Waa mid sidoo kale waxyeello ku ah horumarka cunugga iyo hab ciqaabeed aan cunugga waxba ka qabanayn.

Dhibbanaha iyo qofka dagaalka sameeyayba waxey heli karaan caawimaad.

### Dagaalka sharafta la xiriira

Dagaalka sharafta la xiriiraa waa dagaal looga danleeyahay in lagu difaaco sharafta qoyska ama reerka marka qof xubin ka ah looga shakiyo in uu dhaawacay ama dhaawacday sharafta qoyska.

Difaacinta sharafta qoyska ama reerku kama ahan Finland sabab la aqbali karo oo lagu geysto hanjabaad, cadaadin ama dagaal. Dagaalka iyo hanjabaadu waa dembi aan loo eegeyn dhaqanka dhibbaha ama kan dagaalka sameeyay.

## Caawimaadda loogu talagalay dagaalka

Nollalinja Tel. 080 005 005 Wuxuu furan yahay: maalin kasta

Nollalinja waa telefoon dadka caawiya oo aad wici karto haddii aad qoyskaada dhexdiisa kala kulanto dagaal, dagaal galmo ah ama haddii adiga laguu hanjabo dagaal. Wakhti kasta ayaad wici kartaa. Shaqaalaha adeeggu waxay ku hadlaan Finnish, Iswidhish iyo Ingiriis.

Xarunta xasaradda ee Monika Tel. 0800 05058 Wuxuu furan yahay: maalmaha shaqada

Telefoonka dadka caawiya ee Xarunta xasaradda Monika waxaa loogu talagalay dumarka dalka u soo guuray. Telefoonka wax caawiyaa wuxuu ku adeegaa luqado kala duduwan. Waad soo wici kartaa haddii aad qoyskaada dhexdiisa kala kulantay dagaal, dagaal galmo ama hanjbaad.

# Ka ganacsiga dadka iyo ku shaqaysiga qasabka ah

Ka ganacsiga dadku Finland wuxuu ka yahay dembi. Ka ganacsiga dadku tusaale ahaan waa:

- ku qasbidda shaqo laga bixinayo mushaar aad u yar ama aan gebi ahaanba mushaar laga bixineyn
- ku qasbidda iibinta galmada
- ku qasbidda dawarsashada ama dembi sameynta
- ku qasbidda guur

Dhibbanayaasha ka ganacsiga dadku waxey heli karaan caawimaad. Haddii aad ka shakiso in aad tahay dhibbane ka ganacsiga dadka, la xiriir nidaamka caawinta dhibbanayaasha ka ganacsiga dadka (Ihmiskaupan uhrien auttamisjärjestelmä). Macluumaadyada xiriirka waxaad ka heleysaa bogga shabakadda ihmiskauppa.fi.

Haddii aad noqotat ama ay jirto sabab loo qaateen ah oo looga shakiyo in aad noqotay dhibane ka ganacsiga dadka, waxaa lagu siin karaa sharci deganaanshaha Finland. Si aad codsato sharciga deganaanshaha ee ku salaysan ganacsiga dadka, waa in aad Finland joogtaa. Haddii aad ku jirto xaalad aad u nugul, waxaad heli kartaa sharciga deganaanshaha ee siisocda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciga deganaanshaha ee loogu talaggalay qofka dhibane u noqday ka ganacsiga dadka Hogaanka socdaalka.

Haddii aad haysato sharciga deganaanshaha Finland islamarkaasna aad noqotay dhibane uu shaqo-bixiyuhu ka faa'iidaystay, waxaad codsan kartaa sharciga cusboonaysiinta sharciga deganaanshaha ama caddaynta ballaarinta xaqa shaqo qabashada ee ku salaysan ka faa'iidaysashada shaqo-bixiyaha. Codsiga sharciga deganaansha ee sii socda ee ku salaysan ka faa'iidaysashada shaqo-bixiyaha, haddii uu sharciga aad hadda haysato kaa dhacayo islamarkaasna aadan haysan shaqo-bixiye cusub. Codso caddaynta loogu talaggalay ka faa'iidaysashada shaqo-bixiyaha, haddii uu sharcigaadu shaqaynayo islamarkaasna aad haysato shaqo-bixiye cusub. Caddaynta ama sharciga sii socda waxaad uga shaqan kartaa laan kasta oo shaqo ah.

# 2.9. Waqtiyada firaaqada

## Maktabadaha

Dhammaan magaalooyinka dalka Finland waxaa ku yaal maktabad ay degmadu ama magaaladu leedahay. Maktabadu waa meel laga amaahan karo buugaagta, lagu akhrisan karo wargeysyada, lagu isticmaali karo kombuterka, wax lagu baran karo ama looga qayb geli karo dhacdooyinka ama nashaadaadka kala duwan.

### Maktabadda luuqadaha badan

Maktabadda luuqadaha badan waxaa laga helaa walxo ama macluumaad ku qoran in kabadan 80 luuqadood. Maktabadda waxay ku taalaa Helsinki Pasila. Maktabada luuqadaha badan buugaagteeda ama cajaladeheeda waxaa laga deyman karaa meel kasta oo ka mid ah Finland. Waxaad shaqaalaha maktabadaada ka dalban kartaa inay kuu dalbaan walxaha ama buugaagta aad doonaysid. Macluudka dheeraadka ah ee la xiriira maktabadda luuqadaha badan buugaagta ama walxaha yaala waxaad ka heli kartaa bogagga maktabadda ee Helmet.fi ee Helsinki iyo agagaarkeeda.

## Isboortiga

Dalka Finland dad badan ayaa hiwaayad ka dhigta jimicsiga, sidoo kale hiwaayada jimicsigu waxay kaa caawinaysaa inaad la kulantid dad iyo heshid saaxiibo cusub. Jimicsiga la hago inta badan waxaa qabta naadiyada isboortiga ee kala duwan, kuwaas oo inta badan ku shaqeeya si mutaddawacnimo ah.

Jimcisiga la hago waxaa tusaale ahaan qabanqaabiya degmooyinka iyo jimciyadaha isboortiga.

### Meelaha dhaq-dhaqaaqa jirka lagu sameeyo

Magaalooyinka waaweyn waxaa ku yaala xarumo isboorti oo gaar loo leeyahay. Waxyaabaha ay bixiyaan iyo qiimahoodaba waxaad si toos ah u weydiin kartaa xarumahaas isboortiga.

# Ku raaxeysiga iyo ku socodka dabeecadda

Dabeecadda Finnishku waa kala duwan yahay. Ku raaxeysiga iyo socoshada dabeecaddu waa wax xiiso iyo nabadgelyo leh, haddii aad dooratid wado ku habboon awoodaada socod iyo xirfadaada isla markaasna aad ilaalisid tilmaamaha hagitaanka ee lagu siiyey.

## Ku socodka barafka

Xilliga barafka inta badan dhul biyoodka Finnishka waxaa daboola baraf. Tusaale ahaan barafka dushiisa waa lagu socon karaa, lagu sameyn karaa iskeytin ama iskii waana laga kaluumeysan karaa ayadoo barafka la dalooliyo. Ku socdaalka barafka waxaa mar walba la xiriira khatar, sidaas darteed nabadgelyada in laga fakaro aad ayey muhiim u tahay. Markasta hubi xajmiga iyo awoodda adkaysi ee bararka ka hor inta aadan bararka aadin.

## Xaqa uu qof walba leeyahay oo aan ruqsada u baahneyn

Xaqa uu qof walba leeyahay waxaa loola jeedaa fursadda ay dadka oo dhan u helayaan in ay si xor ah ugu dhaqdhaqaaqaan bay'ada Finland. Xaqa uu qof kasta leeyahay waa qayb muhiim ah oo ka mid ah dhaqanka Finnishka iyo sharci-dejinta.

### Xaqa uu qof kasta leeyahay oo koobaan

Waxaad:

- ku dhex socon kartaa bey'ada, adigoo iskii samaynaya ama baaskiil ku wadaya, sida kaymaha, dhul-cawseedka dabiiciga ah iyo dhul-biyoodka;
- si ku meel gaar ah u joogi kartaa, meelaha la ogol yahay in la maro, tusaale ahaan teendho ayaad ka dhisan kartaa meelahaas si xor, haddii aad ka taxadarto inaad in ku filan ka fogaato guryaha dadka;
- guran kartaa miraha bey'ada, likaha iyo dhirta aan guritaankooda la reebin;
- ku kalluumeysan kartaa maqaalin iyo baraf daloolin (kalluumaysiga iyo maqaalin ku jillaabashadu waa ma mamnuuc dhul-biyoodyada qaar);
- ku wadi kartaa doon, waad ku dabaalan kartaa barafkana waad ku dul socon kartaa.

Laguuma ogolaa inaad:


- qash-qashaadid ama dhibtid dad kale ama deegaanka;
- ku socotid dhulka ardaaga ah, geedaha la tallaalay ama abuurka beeraha ku jira;
- qashqashaaddo xayawaanka ama aad waxyeelleyso buulasha iyo dhasha shimbiraha;
- jartid ama waxyeelaysid geedaha baxaya;
- qaadato geed la qallajiyey ama jabay, laamo, doogga jilicsa ama doomaarka;
- dab bannaan ku shiddo;
- qash-qashaadid nabadgelyada guriga, tusaale ahaan adoo kaam ka samaysanaya meelo guyaha dad kale u dhaw ama ku qaylinaya;
- wasaqayso bay'ada;
- gaari ku waddo meel aan wado ahayn;
- ka kaluumeysato ama ka ugaarsato.

## Ururada

Finland markii loo fiiriyo bulshada ku nool waxaa ku yaala jaaliyado badan. Sida waafaqsan dastuurka cid walba ayaa xaq u leh iney ku shaqeystaan urur ahaan. Xorriyada iskutagu waxay sidoo kale taabanaysaa ajaanibta.

Ururku wuxuu tusaale ahaan noqon karaa koox isboorti, urur dhaqameed, urur saaxiibtinimo ama urur diimeed..

Finland waxaa ku yaala ururo badan oo ajaanibtu sameysteen. Urur ajnabi ama urur saaxiibtinimada wadankaaga wuxuu kaa caawin karaa inaad ilaashatid dhaqankaaga iyo inaad ku hormarisid dhaqankaaga bulshada cusub oo aad ku dhex nooshahay aadna wada shaqayn la sameeysid shaqaalaha dawlada iyo ururada kale. Adeegga shabakadda ururka (Yhdistysnetti) ee Maamulka laysinka iyo rasjitareeshinka waxaad ka raadsan kartaa ururo kala duduwan.



# 3. Warar ku saabsan Finland

## 3.1. Warar aasaasi ah oo ku saabsan Finland

### Finland oo la soo koobay

#### Dowladda

- Finland waa jamhuuriyad waxayna xubin ka tahay Midowga Yurub (EU).
- Caasimadda Finland waa Helsinki.
- Finland waxay u qeybsantahay degmooyin leh is-maamul.
- Ahvenanmaa waa deegaan ismaalula oo Finland ka tirsan.

#### Dadka

- Finland waxaa deggan 5,5 milyan oo qofood.
- Luqadaha rasmiga ah ee Finland waa Finnish iyo Iswidish (qiyaastii 5 % dadka Finnishka ah waxay sidii afkooda hooyo ugu hadlaan iswidish).
- Waxaa kale oo Finland deggan dadka saamiyiinta ah. Saamiyiintu waa dadka kaliya ee asalka ah ee Midowga Yurub.
- Finnishka badnaatooda waxay si fiican ugu hadlaan ingiriiska.
- Dadka luqadaha qalaad ku hadla waa 8%.

#### Juquraafiga iyo jawiga

- Finland waxay ku taalaa Waqooyiga Yurub gaar ahaan Soonaha Badda Baltiga.
- Wadamada deriska Finland la ah waa Ruushka (bariga), Norway (Waqooyiga), Sweden (galbeedka) iyo Estonia (koonfurta).
- Ballaca Finland waa 338 432 $km^2$, waxaana ku jira dhulka Finland iyo gudaha biyaha.

#### Dhaqaalaha

- Lacagta Finland waa yuuro.

# Gaadiidka gudaha Finland

## Gaadiidka dadweynaha

Gaadiidka dadweynuhu Finland si fiican ayuu uga shaqeeyaa. Tareenada iyo basaska waxaad ugu safri kartaa ku dhowaad dhammaan gudaha Finland. Magaalooyin badan waxaad sidoo kale ku tegi kartaa diyaarad. Magaalooyinka waaweyn iyo kuwa u dhow waxaa sidoo kale ka jira gaadiid deegaaneed si fiican u shaqeeya. Gaadiidka deegaanku wuxuu inta badan ku shaqeeyaa basaska.

Gaadiidka tareenada waxaa Finland gacanta ku haya VR. Waxaad ka iibsan kartaa tikidhida tareenka shabakadda VR, ablikeeshinka VR Matka, mashiinka tikidda iyo goobta iibinta tikidhada ee maxaddooyinka tareenka. Macluumaadka jadwalka tareenada waxaad ka heleysaa bogagga shabakadda VR ama saldhigyada tareenada.

Shirkadaha basaska ee gudaha Finland waa badan yihiin. Waxaad tikidhada basaska safarka dheer aada ka iibsan kartaa bogagga shabakadda Matkahuolto, ablikeeshinka waddooyinka iyo tikidhada, ablikeeshinka Tikidhada basaska, goobaha adeegga ee Matkahuolta ama darawalka baska. Macluumaadka jadwalka basaska waxaad ka heleysaa bogagga shabakadda Matkahuolto ama goobaha shaqada ee Matkahuolto.

## Lahaanshaha baabuur

Haddii aad leedahay baabuur, waxaa qasab kugu ah inaad gasho caymiska gaadiidka (liikennevakuutus). Caymiska gaadiidka waxaad ka heleysaa shirkadaha caymiska.

Finland baabuurka waa in la soo koontaroolaa islamarkaasna la rajistareeyaa. Koontaroolka baabuurta waxaa sameeya xarumaha koontaroolka. Rajistareeshinka waxaa laga sameystaa sidoo kale xarumaha koontaroolka baabuurta, shirkadaha caymiska iyo goobaha lagu gado baabuurta. Bogagga internetka ee Traficom ayaad ka sameysan kartaa rajistareeshinka.

Finland sharciga ayaa amraya in baabuurka ay ku jiraan lugaha jiilaalka ama barafka xilliga jiilaalka. Xilliga jiilaalka waxaad isticmaali kartaa lugaha leh biinanka ama kuwa kale nastada leh. Baabuurka ay ku jiraan lugaha nasta waxaa sahlan in lagu koontaroolaa wadooyinka taraaraxa ah. Si kastoo ay ahaataba lama isticmaali karo lugaha nasta xilliga xagaaga.

## Laysinka baabuurta

Baabuur waxaad Finland ku wadi kartaa, haddii aad heysato leysin shaqaynaya oo kaliya. Si aad u hesho leysinka baabuurta waa inaad ahaataa ugu yaraan 18 sano jir. Kahor inta aadan helin laysinka baabuurta waa inaad ka qeyb-qaadataa waxbarashada wadista kadibna aad sameysaa imtixaanka wadaha. Barashada wadista waxaad ka heli kartaa iskuulka wadista. Tusaale ahaan waxaa sidoo kale wadista ku bari kara qaraabo ama qof aad taqaano oo heysta leysinka islamarkaasna leh waayo-aragnimada wadista baabuurta oo ugu yaraan shan sano. Arrintan darteed waxaa ruqsadda barista looga baahan yahay Traficom.

### Laysinka ajnabiga ee Finland lagu heysto

Haddii aad haysatid kaarka gawaarida lagu wado oo laga bixiyey waddan Midwoga Yurub ah ama waddan ETA ah, wuu ka shaqaynayaa dalka Finland. Haddii aad doonayso, waxaad ku beddeli kartaa leysinka Finnish ah, waa haddii aad si rasmi ah u degantahay Finland.

Haddii aad haysatid kaarka gawaarida lagu wado oo laga bixiyey wadan kale oo ku jira wadamada sixiixay heshiiska jidadka ee Geneva ama Wien, markaas waxaad leysinka gaari ku wadan kartaa dalka Finland gudihiisa ugu badnaan labo sano. Kaddib marka aad si rasmi ah u degto Finland, waxaad heysataa muddo labo sano ah oo aad ku beddelato kaarka wadista baabuurta ee dal shisheeye laga bixiyay. Haddii aad wakhti hore beddelan kaarka, waxaa qasab kugu noqonaysa inaad Finland ku sameyso imtixaanka darawalka (imtixaan qoraal iyo wadis ah).

Haddii aad haysatid kaar laga bixiyey wadan aan ka mid ahayn wadamada sixiixay heshiiska jidadka ee Geneva ama Wien. Sannad ayaad ku wadan kartaa baabuur kaarkan marka adiga laguugu qoro nidaamka macluumaadka dadka ee Finland. Waa inaad Finland ku sameyso imtixaanka darawalka, haddii aad doonayso in aan leysinkaada u beddesho leysinka Finnishka.

Beddelista leysinkaada aad u beddeleyso leysinka Finnishka waxaad ka codsan kartaa goobta adeegga ee Ajovarma. Horay ballan uga sii qabso bogagga shabakadda Ajovarma.

## Saxaafadda gudaha Finland

Finland waxaa ka jirta madaxbannaani saxaafadeed waxayna Finland sannado badan kaalinmaha hore ka gashay indegsiga xorriyadda saxaafadda. Shirkadda warbaahinta qaranka yacni Yle oo shirkadda adeegga warbaahinta dadweynaha ee madaxa bannaan, kaas oo kanaalladiisa aad ka heleyso macluumaadyo muhiim ah oo luqado badan ku qoran. Waxaa intaas dheer oo Finland ka jira warbaahinno badan oo la aamini karo oo gaar loo leeyahay. Hab saxaafadeedka wanaagsan waxaa ilaaliya islamarkaasna horumariya guddiga saxaafadda.

Shabakadda waxaad ka heleysaa warar iyo barnaamijyo badan oo luqado kala duwan ku baxa. Tusaale ahaan Yle wuxuu bixiyaa warar ku baxa af Finnish, Ingiriis iyo Ruush. Barnaamijyada janaalada Yle iyo kuwa ganacsiga ah waxaad ka sokow telefishinnada ka daawan kartaa shabakadda. Barnaamijyo tv oo badan ayaa ku baxa afka Finnishka. Barnaamijyada luqadaha qalaad waxaa Finland qoraal ahaan loogu turjumaa af finnish, yacni waxaa barnaamijyadaas kula socon kartaa xittaa luqaddoodi asalka ahayd.

Finland waxaa kasoo baxa jaraaido badan. Ka ugu wayni waa Jaraa'idka odhaahda Helsinki ( Helsingin sanomat). Badanaa jaraa'idadu waxay kusoo baxaan af finish. Qaarkood kale oo maxaliga ahina waxay kusoo baxaan afka iswidishka.

Shirkadda warbaahinta qaranka, yacni Yle wuxuu leeyahay saddex kanaal oo telefishin ah, kuwaas oo laga arko Finland oo dhan. Yle waa adeeg dadweyne shaqooyinkiisa waxaa lagu maalgeliyaa lacagta canshuurta. Ka sokow kan waxaa kale oo Finland ka shaqeeya telefishinno ganacsi ah, sida MTV3 iyo Nelonen.

Finland in badan oo idaacado ah baa ka shaqeeya. Intooda badan waxaad ka dhagaysan kartaa xataa internetka. Inta badan kanaalada raadiyayaashu waxay ku baxaan af finnish.

## Dhaqamada iyo diimaha ka jira Finland

### Dadka Finland

Tirada dadka Finland waa qiyaas ahaan 5,5 malyan oo qofood. Finland waa dal bannaan. Dadku waxey si gaar ah ugu soo aruureen magaalooyinka waa weyn iyo deegaamada. Soonaha caasimadda waxaa deggan dad ka badan malyan.

Dadka Finland waxaa ku jira bulshooyin kala duwan oo ah dadka laga tirada badan yahay, kuwaas oo leh luqad, dhaqan ama diin ka duwan kan Finnishka intiisa badan haystaan. Dadka laga tirada badan yahay ee soo jireenka ah waa tusaale ahaan Finnish-Iswiidhishka, Saamiyiinta, Roomaaniyiinta, Yuhuudda iyo Tataariyiinta. Waxaa kale oo Finland deggan dad halkan u soo guuray oo ka yimid Ruushka, Istooniya, wadamada Balkaanka, Soomaaliya iyo Ciraaq.

### Diimaha Finland

Inta badan dadka Finnishka ah waa Kirishtaan. Madhabta ugu weyn waa Kaniisadda Efangelis-luteeriga oo ay ka mid yihiin qiyaas ahaan 70% bulshadu. Kaniisadda Ortodoksiga ee Finland waa madhab diimeedka labaad ee ugu weyn. Wax yara kayar 1% bulshada ayaa ka tirsan kaniisadda Ortodoksiga. Kaniisadda Efangelis-luteeriga iyo kaniisadda Ortodoksiga waxey Finland ku leeyihiin derajo gaar ah. Tusaale ahaan waxey xaq u leeyihiin in ay canshuur qaataan.

Tobaneeye kun oo Muslimiin ah ayaa deggan Finland. Si kastoo ay ahaatase qeyb iyaga ka mid ah oo kaliya ayaa ka tirsan jimciyadaha Islaamiga ah. Waxaa sidoo kale Finland deggan dhowr kun oo Yuhuud ah. Helsinki iyo Turku waxaa ka shaqeeya macbudka Sinagoogiga.

Jimciyad-diimeedyada kale ee Finland ka jira waa tusaale ahaan Kaniisadda Katooliga ee Finland. Kaniisadda Helluntai, Kaniisadda Xorta ah, Kaniisadda Adventi, Kaniisadda Mormoriga iyo tan kuwa raacsan Jehova.

Qiyaasti saddex qaybtood hal qayb oo ka mid ah dadka Finland deggan kama tirsana wax jimciyad diimeed ah.

### Xornimada diinta iyo ku cibaadeysashada diintaada gudaha Finland

Finland waxaa ka jira xorriyadda diimeed. Dhammaan dadka ku nool Finland waxey xaq u leeyihiin in ay diinta ay rabaan doortaan islamarkaasna ku cibaadeystaan. Haddii aadan la dooneyn, ma ahan qasab in wax diin ah la doorto. Cidna qasab kuma ahan in uu ka qeybqaato cibaadeysi diimeed.

Waalidka ayaa go’aaminaya diinta cunugga qaadanayo. Haddii ay waalidku ku aragti duwan yihiin arrinta, wax diin ah cunugga laguma darayo. Haddii ay maxkamadu labada waalid midkood u xukuntay in uu kaligiis mas’uul ka ahaado cunugga, isaga ayaa kaligiis go’aan ka gaaraya diinta cunugga.

Qofka qaangaarka ah, yacni qofka buuxiyay 18 sano wuxuu iskiis u go’aansan karaa diintiisa.

## Doorashooyinka iyo codeynta Finland

Finland waxaa doorasho lagu soo doortaa golaha degmada, golaha gobolka ee aagga nololwanaagga, baarlamaanka iyo madaxweynaha. Waxaa intaas dheer oo Finland loo codeeyaay baarlamaanka Yurub. Sida caadiga ah waxaa xaqa codeyn leh muwaadiniinta Finnishka oo dhan, kuwaas oo buuxiyay 18 sano. Inkastoo aadan ahayn muwaadin Finnish ah, waxaad lahaan kartaa xaqa codeynta ee doorashooyinka degmooyinka, doorashooyinka goboolada iyo doorashada baarlamaanka Yurub.

# Sharciyada iyo xuquuqda

## Xuquuqda aasaasiga ah

Dhamaan dadka deggan Finland sida sharcigu qabo waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad. Xuquuqyada iyo waajibaadyada soo socda waxay quseeyaan sidoo kale ajaaniibta deggan Finland.

### Xuquuqyada

- Dadkoo dhan waxay xaq u leeyihiin in si isku mid ah loola macaamilo. Cidna si dadka kale ka duwan loolama macaamilo karo tusaale ahaan jinsi, da', diin ama naafo dartood.
- Qof kasta wuxuu si xornimo ah u sheegi karaa islamarkaasna u qori karaa fikirkiisa.
- Dadku waxay qabanqaabsan karaan shirar iyo bannaanbaxyo waana sidoo kale ka qeybgeli karaan. Bannaanbaxa waa in booliska horay loo sii ogeysiiyaa.
- Qofna dil laguma xukumi karo lamana jirdili karo.
- Dadka oo dhan waxay si xornimo ah u dooran karaan meesha ay ka degayaan Finland.
- Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xafidaadiisa shaqsiyadeed. Warqadaha qof kale lama aqrin karo sidoo kale telefoonka qof kale lama dhegeysan karo.
- Qof kastaa wuxuu dooran karaa diintiisa. Haddii uusan dooneyn loogama baahna in uu wax diin ah doorto.

### Waajibaadyada

- Dhamaan dadka deggan ama jooga Finland waa inay u hogaansamaan sharciga Finland.
- Qiyaas ahaan 7- 18 sano inta u dhexeysa waxaa saaran waajib waxbarasho.
- Inta badan dadka ka shaqeeya Finland waa inay canshuur ka siiyaan Finland mushaarkooda.
- Dadka oo dhan waxaa waajib ku ah inay cadaalada ka marqaati kacaan, haddii iyaga looga yeero halkaas.
- Waalidka waxaa waajib ku ah inay daryeelaan carruurtooda.
- Dadka oo dhan waxaa waajib ku ah inay caawiyaan marka u shil dhaco.

## Sharciyada Finland ka jira

Bulshada Finnishka ah iyo waxqabadkeeda waxaa xeera shuruuc. Kan ugu muhiimsan kuwaan waa dastuurka (Perustuslaki). Dhamaan dadka deggan Finland waa inay u hogaansamaan shrciyada Finland. Saraakiishu xitaa waa inay u hogaansamaan sharciga. Sharciga waxaa dejiya baarlamaanka. Qof kasta ayaa

u caban kara madaxa xafiiska cadaaladda (oikeuskansleri) ama sharciyaqaanka baarlamaanka (eduskunnan oikeusasiamies), haddii uu ka shakiyo in sarkaal uu sharciga jebiyay. Dadka Finnishka ah iyo dadka deggan Finland waa inay sidoo kale u hogaansamaan sharciyada Midowga Yurub.

# Sinnaanta iyo isku qiimo ahaanshaha

## Sinnaanta ka dhexeysa ragga iyo dumarka

Sida uu qeaxaayo sharciga dalkan Finland, ragga iyo dumarku waxaa ay leeyihiin isku xuquuq. Xitaa dumarka la qabo waxaa ay leeyihiin xuquuq la mid ah tan ragga

Ragga iyo dumarkaba iyaga ayaa nafsad ahaantooda go'aan ka gaari kara cidda ay doonayaan in ay is guursadaan. Finland waa arin danbi ah in qofka lagu khasbo guur aanu raalli ka aheyn. Tusaale ahaan waalidku xaq uma lahan in ay caruurtooda ku khasbaan ama cadaadis ku saaraan in ay gursadaan. Ragga iyo dumarkuba si isku mid a ayay xaq ugu leeyihiin in ay furiin dalbadaan. Furiinkana waxaad heli kartaa, iyadoo aan wax ogolaansha ah laga heynin lammaanaha kale.

Dagaalku waa arin danbi ah dalkan Finland. Sidoo kale dagaalka ama gacan ka hadalka ka dhex dhaca qoyska sida garaacidda, iyo kufsiga ama faraxumeynta xagga jinsiga ah waa danbi.

### Sinnaanta xagga shaqada

Goobaha shaqada waa in si isku mid ah loola dhaqmaa ragga iyo dumarkaba. Lama ogola in qofka la takooro, iyadoo loo eegaayo jinsiga uu yahay. Waxaa taa loola jeedaa in iyadoo loo eegaayo xagga jinsiga qofku uu yahay, in aan ragga la siin karin mushaar ka badan kan naagaha, ama aan haweeyneyda shaqada looga eryi karin sababtoo ah uur ayay leedahay.

Sharciga sinnaanta ayaa diidaya in qofka lagu takooro jinsiga uu ka soo jeedo awgeed. Mas'uulka u xilsaaran sinnaanta, waa howl-wadeen dowladeed oo ilaalinaya sida loogu dhaqmo sharciga sinnaanta. Haddaad tuhunsan tahay in adiga goobta shaqada lagugu takooray jinsiga aad tahay awgeed, waxaad la xiriiri kartaa mas'uulka u xilsaaran arimaha sinnaanta (tasa-arvovaltuutettu) ama ururkaaga xirfadlayaasha ee u dooda xuquuqda dadka shaqeeya.

## Sinnaanta

Sida waafaqsan dastuurka Finland waa in si sinnaan ah loo tixgeliyaa. Takoorku waa denbi.

### Xuquuqda dadka sekshuwaal ahaan laga tirada badan yahay iyo jinsi ahaan kuwa laga tirada badan yahay

Siduu sharciga Finland dhigayo qofna laguma takoori karo jiheyntiisa galmo awgeed. Sharciga ayaa sidoo kale mamnuucaya takoorista muujinta waxyaabaha galmada xiriir iyo aqoonsigooda jinsi dartood.

Finland waxaa isku guursan kara labo qofood oo isku jinsi ah.

### Xuquuqda carruurta

Finland cunuggu wuxuu xaq u leeyahay xannaano iyo daryeel gaar ah. Cunuggu waxaa kale oo uu xaq u leeyahay in uu soo bandhigo fikirkiisa. Cunuggu wuxuu xaq u leeyahay in fikirkiisa ogaal loo yeesho marka arrimo isaga quseeya go'aan laga gaarayo. Sida sharciga Finland uu qabo edbinta jireed ee carruurtu waa mamnuuc waxaana laga heli karaa ciqaab.

### Xuquuqda naafada

Sida sharcigu qabo, qofka naafada ah lama takoori karo. Qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay nolol caadi ah in uu ku noolaado, tusaale ahaan in uu waxbarto, shaqo sameeyo qoysna aasaasto. Sida uu qabo sharciga sinnaantu shaqo-bixiyayaasha iyo qabanqaabiyayaasha waxbarashadu waa inay hagaajiyaan fursadaha dadka naafada ah si ay shaqo iyo waxbarasho u helaan. Tusaale ahaan bii'ada shaqada waxaa loo bedeli karaa qaab ay qofka naafada ah ugu sahlanaato in uu ku dhaqdhaqaaqo.

## Saraakiisha muhiimka ah

### Hoggaanka socdaalka

Marka aad Finland u soo guurto, waa in Hoggaanka socdaalka yacni Migrika codsataa sharciga deganaanshaha ama aad ka diiwaangelisaa xaqaada joogitaanka dalka. Baahida sharciga deganaanshuhu waxay ku xiran tahay waddanka aad u dhalatay iyo sababta iyo wakhtiga aad Finland joogayso. Waxaa kale oo uu Hoggaanka socdaalku ka baaraandegaa codisyada magangelyada iyo codsiyada jinsiyadda.

### Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka

Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka, DVV, waxay qaabilsantahay nidaamka macluumaadka dadka ee Finland, halkaas oo lagu qoro macluumaadyada dadka Finland deggan. Haddii ka soo guurto dibadda una soo guurto Finland, gudaha Finland ku dhex guurto ama Finland ka guurto, waa in aad ku wargelisaa Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka. Waxaad

hay'adda ka codsan kartaa summadda aqoonsiga qofka haddii aadan ka heli Hogaanka socdaalka ama xafiiska canshuurta. Goobaha adeegga ee Hay'adda dijitaalka iyo macluumaadka dadka waxaa kale oo lagu qabtaa sida meherka xafiiska diiwaangelinta iyo adeegyada nootaayada guud. Qaab elegtroonig ah ayaa adeegyo badan ku qabsan kartaa.

## Maamulka canshuuraha

Maamulka canshuuraha, yacni xafiiska Canshuurta (Vero) waxaad ka heleysaa kaarka canshuurta, waxaad ku beddeli kartaa boqolkiiba inta canshuurta lagaa jarayo ama waxaad weydiin kartaa arrimaha la xiriira canshuurista.

Adeegga shabakadda Omavero ee Canshuurta waxaad qaab elegtroonig ah uga qabsan kartaa arrimo badan oo canshuurta la xiriira, haddii aad haysato aqoonsiyada shabakadda bangiga ama xaqiijinta mobaylka. Waxaad sidoo kale ka dalban kartaa kaarka canshuurta oo cusub ama waxaad ka hubin kartaa wargelinta canshuurta.

## Kela

Hay'adda hawlgabka qaranka yacni Kela waxay qaabilsantahay ammaanka aasaasiga ah ee dadka Finland deggan marka ay ku jiraan xaaladaha nololeed ee kala duwan. Kelada waxaad ka heli kartaa caawimaad lacageed, marka ay dakhliyada kale ay yaraadaan.

Kaalmooyinka Keladu waa tusaale ahaan

- kaalmada ijaarka
- kaalmooyinka la xiriira jirrashada ama naafanimada
- ammaanka shaqo la'aanta
- kaalmooyinka ardayga la siiyo
- kaalmooyinka qoysaska carruruta leh
- hawlgabka qaranka, hawlgabka dammaanad-qaadka iyo kaalmooyinka kale ee la siiyo dadka hawlgabka ah
- lacagta kaalmada nolosha

## Xafiiska shaqada iyo meherada

Adeegyada Xafiiska shaqada iyo meherada, yacni Xafiiska shaqad (TE-toimisto) u waa tusaale ahaan

- shaqo gudbin
- tababarada xoogga shaqada
- adeegyada ganacsdaha loogu talaggalay
- hagista doorashada xirfadda

## Xafiiska sooshalka

Degmo kasta waxaa ku yaal xafiiska adeegga sooshaalka/xafiiska sooshalka (sosiaalipalvelutoimisto/sosiaalitoimisto), kaas oo dadka degmada deggan u qabta adeegyada arrimahan soo socda:

- talabixinta xaaladaha marka lagu jiro xaaladaha kala duwan ee dhib ku jiro
- adeegyada kaalmada ee qoysaska
- adeegyada loogu talaggalay waayeelka iyo dadka naafada ah
- heeganka sooshalka iyo xasaradaha ee habeennadi iyo dhammaadka todobaadyada

Macluumaadyada xiriirka ee xafiiska sooshalka waxaad ka heleysaa bogagga shabakadda ee degmadaada.

## Booliska

Shaqooyinka booliskaa (poliisi) waxaa ka mid ah damaanad qaadka nidaamka iyo ammaanka bulshada iyo ka hortaga dembiyada iyo baaritaankooda. Waxaa intaas dheer, booliska Finland ayaa bixiyaa baasaboorada, kaararka aqoonsiga iyo kaararka aqoonsiga ee ajnabiga.

## Wakiiladda sinaanta u dooda

Wakiiladda sinnaanta u dooda (yhdenvertaisuusvaltuutettu), YVV, waa masuul dowladeed howshiisuna tahay horumarinta sinnaanta cadaalad kana hortagaan takoorka. Wakiilku wuxuu la socdaa islamarkaasna horumariyaa heerka iyo xuquuqda dadka aj

Wakiiladda u dooda sinnaanta wuxuu bixin karaa talooyin, hagis iyo soo jeedin, waxaa kale oo uu gacan ka geysan karaa heshiis ka gaarista dhacdooyinka takoorka la xiriira.

Ministry of Economic Affairs
and Employment of Finland

Kotoutuminen.fi
Integration.fi

infoFinland.fi